MAJALADDA
MARAG
Cadadka 14-aad | May 2026

# JIIL DHAXLI DOONA BURBUR MISE YAGLEELI DOONA JAMHUURIYAD?

## GO'DOONKA SIYAASADEED EE DHALLINYARADA, IYO LOOLANKA FOG EE QARAN-DHISKA SOOMAALIYA


Dr. Maxamuud Cabdiraxmaan Maxamuud

Bogga: 8



Xigashada Sawirka: AI

# Qorayaasha Majaladda


**Garanwaynaye guntu waa tee!**
Cabdiweli Axmed Muumin 4



**JIIL DHAXLI DOONA BURBUR MISE YAGLEELI DOONA JAMHUURIYAD?**
Dr. Maxamuud C/Raxmaan 8



**Dhuxul Dambas Huwan:** Doorashooyinka Soomaalida: Shuluggii Reerka oo Isu Rogay Kelitalis
Muxiyadiin Maxamed Cabdi 13



**QAADKA IYO SAAMAYNTIISA BULSHADA:** dhibaatada taagan iyo baahida wacyigelineed - **qeybta 2aad**
Dr. Cabdinaasir Jaamac Warsame 16



**Waxbarashada Puntland ee Maanta:** Caqabadaha Jira iyo Fursadaha Isbeddelka
Muxsin Mowliid 20



**Isbahaysiga Fowdada iyo Kelitalisnimada:** Soomaaliya mar labaad ma geli kartaa kelitalisnimo iyadoo fowdo ka cararaysa?
Zakaria Xaaji Axmed Iley Rabiica 25



**Xaaji Faarax Oomaar Ileeye (1879–1949):** Waddani Adag iyo Qareenkii Ugu Horreeyay ee Soomaaliyeed
Dr. Cabdiraxmaan Baadiyow 28



**Siyaasadda Daboolidda Qarashaadka Adeegga Caafimaadka Puntland:** Gorfeyn
Cabdinuur C.Soofe 31



**Taxanaha "Diin iyo Dawlad"**
**Qeybta 1aad**
Dr. Maxamed Cali Faarax 35



**DOORKA XISAABIYAYAAASHA SOOMAALIYEED EE KOBOCA DHAQAALAHA DALKA IYO KALSOONIDA BEESHA CAALAMKA**
Cali Xaaji Warsame 40



**Gooni-isu-taag Mise Midnimo? Mustaqbalka Somaliland iyo Soomaaliya Aqoonsiga Israel Kadib!**
Cabdullahi Faarax Mire 45



**YAAN SULEEKHO KAA DHIMAN!**
Maxamed Cali Adan (Hoorri) 49

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin mudan in aan soo saarno cadadka 14-aad ee Majalladda Marag, oo ah madal warbaahineed oo loogu talagalay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee taabanaya nolosha bulshadeena.


Majaladan ujeedkeedu waa in la helo madal ka duwan warbaahinta dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad dhigaal noqda, waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya bulshada gaar ahaan dhallinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go’aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Marag waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

Cadadkan 14-aad qormooyinka xiisaha leh ee ku jira waxaa ka mid ah: taxane cusub oo la dhaho diin iyo dawlad iyo qormooyin kale oo ku saabsan waxbarashada, siyaasadda, taariikhda iyo arrimaha bulshada Soomaaliyeed, kuwaasoo diiradda saaraya caqabadaha jira, fursadaha isbeddelka, doorka dhalinyarada, khataraha kelitalisnimo iyo fowdo, iyo sidoo kale muhiimadda wacyigelinta, horumarka iyo dhismaha dowladnimo iyo midnimo qaran.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud

# GARANWAYNAYE GUNTU WAA TEE!



Cabdiweli Axmed Muumin



Xigashada Sawirka: SNTV

# 1.ARAR:

Erayada ay haddiiba dhagta qofka Soomaaliga ahi, gaar ahaan inteeda geeleyda ahi, ku baraarugeyso oo ay markiiba adeegsigiisa u dhug yeelanayso waxaa ka mida erayada 'gun' iyo 'gob'. Waa laba eray oo aalaaba isku 'aag' ka hawl gala: Haddii midkood la soo 'kiciyo' -oo la adeejiyo- kan kalana u badi inuu soo jeedo oo uu hawllan yahay isna! Tusaale ahaan waxaad maqlaysaa iyadoo la leeyahay "waa gun", waa "gunnimo", "waa gun dhaqankeed"; "oo ma gun baan ahay!", "oo ma gun baa tahay!", "guntu yeelkeed!", "alla gunsanaa!", "alla! gunnimo weynaa", "waa inan gumeed!", iyo adeegsiyo kaloo badan oo dhammaantood maag iyo aabi looga socdo, iyo weliba gobanimo-ku-faan. Saasoy tahay haddana eraygu adeegsi maag uun ah kuma yimaado.

Adeegsiyo afeed oo kaloo badan buu leeyahay. Qaarkood bal aan keenno. Waxaa ka mid "ceelka guntiisa", "guntuu u tagey!", "geedka guntiisa", iyo waliba maahmaahdii caanka ahayd ee "haani gun bay ka tolantaa". Sidaynu aragno erayga gun iyo bahdiisuba, sida guney!, guntaas, kw , waxay afsoomaaliga ku leeyihiin adeegsi aad u ballaaran oo sida in weyn oo dhaqanka, aragtida, iyo weliba hannaanka beelo-dhaqameed ee guud ahaan dadka Soomaaliyeed, sii gaar ahaanna qaybteeda geeleyda ah, sidaynu horayba u soo tilmaannay, sugaanta geeleyda Soomaaliyeed ee badanna ku cad.

# 2.QEEXID:

Haddaynu isla aragnay in eraygu 'laandheere' yahay 'gunnimo' na ay ka dheertahay, - waxaan uga soconnaa 'laandheere' eray aad loo adeegsado oo xagga afka si weyn u hawl gala- bal aynu, horta hore, macnihiisa isla garanno oo ku heshiinno. Wuxuu leeyahay Yaasiin Cismaan Keenadiid :

**"Gun (-ta) –**

1. Aan dadka sare oo gobta ah ka mid ahayn ee ka tirsan dadka hoose oo la liido; aan nasab ahayn.
2. (ulajeeddo wanaagsan) dad-weynaha maamulka dhaqanka iyo nolosha tolka ka arrimiya; taliska dadweynaha.
3. Aan dhaqan-wa-naagga iyo reer-magaalnimada la hayn ama aqoon.
4. Dad shisheeye u taliyo oo la gumeysto; beel."

Sidaynu aragnaba qaamuuska Soomaaligu inama siin hal macne oo keliya, ee wuxuu ina siiyey afar. Hadaba maadaama wuxu uu hal eray yahay, ee loo adeegsaday dhawr macne oo kala duwan amaba uu ka hawl galay dhawr meelood, waxaa la isweydiin karaa tolow ma jiraa hal macne oo adeegsiyadoo dhan midaynaya, dabadeedna hadba meeshuu tago macno gaara ka muujinaya? Jawaabtuman waa haa. Waxaa jiraa macne keliya oo dhammaan adeegsiyada erayga, afartuba, ay ku midoobayaan. Bal aynu dhiraandhirinno marka.

Adeegsiga koowaadi waa midka caanka ah ee qaamuusku uu yiri:

**"Aan dadka sare oo gobta ah ka mid ahayn ee ka tirsan dadka hoose oo la liido; aan nasab ahayn".**

Macnaha dulucda ahi marka waa "hoos", oo dadkii baa qaarna la yiri waa ay hooseeyaan qaarna waa ay korreeyaan. Waxa ay ku kala hooseeyaan ama ku kala korreeyaani wax badan bay noqon karaan, halkanse waa dhalashadooda bulsho amaba nasabka, sida qeexiddaba ku cad.
Kan labaad ee qaamuusku ina siiyey, oo weliba ah macnaha keliya ee eraygu leeyahay oo wanaag ah, waa:

**"(ulajeeddo wanaagsan) dad-weynaha maamulka dhaqanka iyo nolosha tolka ka arrimiya; taliska dadweynaha".**
Isna sidoo kale macnihiisa durugsani waa hoos; waa cidda talada bulshada amaba beesha aan looga hoosayn ee iyadu talada, markay cid kastoo kale soo dhaafto, u tageyso.

Macnaha saddexaad ee qaamuusku waa:

**"Aan dhaqan-wanaagga iyo reer-magaalnimada la hayn ama aqoon."**
In kastoo uu macnahaasi waxoogaa durugsan yahay oo laga il-duufi karo, haddana isna waxaa u asala, macno ahaan, hoosayn; Waxaa la sheegayaa in qof uu dhaqankiisu ka hoos maray halkii laga rabey heer magaalo. Halkaasaa hoosayntu, amaba gunnimadu ka soo gashay!
Ugu dambayn wuxuu qaamuusku ina siiyey macne afaraad oo ah:

**"Dad shisheeye u taliyo oo la gumeysto; beel".**

Adeegsigaanna waxaa u asala hoosayn amaba 'gumeysi' oo macnihiisu yahay dad dad kale ay hoosta mariyeen, ulana dhaqmaan sidii dada iyaga ka hooseeya oo kale. Halkaasna waxaa ka dhashay erayo badan oo ay ka mid yihiin gumeyste, gumeysi, gumeysi-diid, gumeystihii, gobanimo-doon, gobanimo-u-dirir, wk.

Aad buu ugu badan yahay afsoomaaliga adeegsiga eraygaani, iyo adeegsiyadiisa afarta ah. Haddaad u kuura gashid waxaad garwaaqsanaysaa in afartaan macne ee raygu leeyahayba ay magacyo yihiin, ha haado magac qof keli loo wado, sida qeexidda koowaad iyo tan afaraad ee qaamuusku uu sheegay, amaba magac wadareed, sida qeexidda labaad iyo afaadi sheegtay.

Yeelkeede waxaa iyaguna jira adeegsiyo kale oo aan magac ahayn ee tilmaan ah. In badan oo tilmaamahan uu erayga 'gun' ku shaqeeyo waataynu ararta qoraalka ku soo sheegnay. Aynu qeexidda erayga 'gun' iyo bahdiisa intaas ku deysanno.

## 3. SOOMAALIDA IYO GUNNIMADA:

Sidaynu ka soo sharqaminnay, soomaalidu aragtiyaha gunnimada iyo gobanimaduba aad bay dhexdeeda uga shaqeeyaan, waana aragtiyo aad u xooggan oo dhuuxa uga jira dhaqanka Soomaaliyeed, keentayna dhib iyo dheef aad u ballaarran labadaba, inkastoo ay dhibtu ka `badan tahay dheefta. Bal aynu sii dhuganno. Waxaa la yiraahdaa suugaantu waa muraayadda laga dheehdo dhaqanka iyo weliba aragtida nololeed ee ay ummadi leedahay. Ciddii doonta inay ummad barato oo dhuuxdo aragtida nololeed iyo weliba teeda diimeed ee ay leedahay, waa inay baratаа oo dheehataa dhitada suugaaneed iyo midda dhaqameed ee umaddaasi. Waxaa dhitadaasi ka mida noocyada hal-abuurka ummaddaasi leedahay, sida gabaygeeda, maahmaahyadeeda, iyo xeer-dhaqameedkeeda guud. Halkaasaa waxaa ka soo baxaya sida ummaddaasi nolosha u aragto iyo waxay rumaysan tahay, if iyo aakhiraba. Kaydkeedaasi dhaqameed waxaa ka mida labada aragtiyood ee aynu ka warramayno ee kala ah 'gun' iyo gob' iyo siday uga shaqeeyaan dhexdeeda.

Bal aynu tusaale ka keenno dhitada suugaaneed ee Soomaalida. Waxaynu weliba keenaynaa laba tuduc oo laba gabay ku kala jira, oo labada eray ee aynu daba-joognaana ay ku wada jiraan. Ugu horrayn aynu soo qaadanno tuduc caan ka ah Soomaalida dhexdeeda, iyo weliba suugaanta laga tiriyey gobanima-doonkii Soomaaliyeed. Waa tuduc ku jira gabaygii Sayid Maxamed Cabdille Xasan ee uu lahaa:

"...............................................

"Eebbow sidii guun haween, giidu waa aniye

Eebbow nin gob baan ahoo, guni rifaysaaye!

Eebbow waxaa noo gurmaday, gaayo alifleeye

................................................"

Sida muuqata, Sayidku wuxuu sheeganayaa gobanimo idaylkeed, hadday tahay nasabnimo, hadday tahay qarannimo, hadday tahay talo iyo guddoon, hadday tahay dadnimo buuxda iyo aqoon, iyo weliba hadday tahay gumeysi diid. Si kale haaddan u niraahno, wadaadku waxaad mooddaa inuu gunnimada afarteeda macne ee aan soo sheegnayba uu iska fogeynayo, sheeganayo gobanimo dhammaanteed. Sadarradan ayaad mooddaa inay ku dhanyihiin macnihii gabanimo dhammaantood -inkastoo aynaan soo sheegin macnaha gobanimada sida aynu u soo sheegnay macnaha gunnimo oo kale, waase iska cadyahay!- iyo weliba gunnimo macnaheedii oo dhan: labada eray ayaad mooddaa inay is ifinayaan xagga macnahooda. Sayidku markuu gobannimadii dhammaateed sheego, isagoo daraawiish iyo halgankeedana matalaya, buu haddana dadka intiisii kale ee colka u ahayd Daraawiish, sokeeye Soomaaliyeed iyo shisheeye Yurubba, wuxuu ku sheegayaa inay gun yihiin.

Sidoo kale waxaa isna wada adeegsaday labada eray, isla hal tuducna ku wada keenay gabayaaga la yiraahdo Cilmi-carab Cabdi. Isagoo Salaan-carrabey gobanimo nasabnimo ah ugu faanaya, haba tabar liitee, Salaan na gunnimo ku sheegaya, haba xoogganaadee, buu Cilmi yiri:

"...............................................

Ladnaantuba waxay kuu ahayd, laba dharaaroode

Gob liciifta waa la arki jirey, gunise waa liide!

................................................"

Cilmi wuxuu sheeganayaa, inkastoo laga xoogroonaado, inuu gobanimada u dhashay oo uu 'gob liciiftay', oo nasab ah yahay, Salaan na wuxuu ugu duurxulayaa inuu yahay gun ka xoog roon xilliga la joogo, laakiin asal ahaan aan nasabnimo u dhalan, xooggeeduna uu yahay uun 'laba dharaarood'! Si kale haddaan u dhigno waxaa inoo muuqda mid ka mida macnihii 'gun' ee afarta ahaa inuu Cilmi ku sheegayo Salaan, isna uu ka durkayo oo uu geedka gobanimada dhalasha ah ka fuulayo.

Macnahan gun ee ah qofka aan nasabka ahayn ayaa ugu weyn uguna badan adeegsiga erayga gun Soomaalida dhexdeeda, uguna saamayn badan,

marka laga fiirsho qarada ay leedahay waxyeellada ka dhalata, amaba ka dhalatay. Waa nin gobanimo sheeganaya, ninkii kalena gunnimo ku sheegaya, iyo nin isagu beeninaya oo la dagaalaya. Waa nin sarrayn, mid dhalasho, mid dhaqaale, iyo mid dhuleed, sheeganaya, kii kalana hoosayn dhalasho, mid dhaqaale, iyo mid dhuleed ku sheegaya, iyo ninkii kale oo intaba beeninaya!

Aadanuhu wuxuu marwalba jecelyahay oo wax ku beeran ah inuu sarreeyo, hoosayntana uu ka cararo, miday tahayba. Hase ahaatee waxaa dhib ka taagan yahay, cidda sheegaysa waxa lagu hoos maro amaba lagu gumoobo, iyo waxa lagu kor maro, amaba lagu goboobo. Ismaan-dhaaf badan iyo colaad lagu hoobtay baa ka dhalatay. 'Qab qab dhaafay baa laba qabiil qaran ku weydaa'!

# 4. TAARIIKHDA GUNTA IYO GOBTA:

Ciddii ugu horreysey ee gobannimo ku faanta waxay ahayd Ibliis. Goortii Eebbe abuuray nebigiisa Aadan waatii la amray Ibliis inuu u sujuudo Aadan oo uu yeelo sida malaa'igtuba yeeshay, oo uu amarka Alle u hoggaansamo. Waase la ahaan weydey Ibliis. Isagoo kasha kibir ka dhaansamay buu sarriig la'aan ku dhiirraday inuu Ilaahay ugu jawaabo, "anigaa ka mudan isaga; aniga waxaad iga abuurtay dab, isagana waxaad ka abuurtay dhoobo!' Wuxuu Ilaahay bi'inayaa waa ba'aane Ibliis halkaasaa muuno uu yeesho ugu dambeysey . Ibliis gobanimada uu sheetay iyo sarraynta ma uusan lahayn ee way la ahaatay. Sida dhabta ah gun ismooddey gob buu ahaa!

Si aynu u helno meel aynu ka cabbir qaadanno, aynu darka waxyiga ka darsanno oo aynu kitaabka Ilaahay u aroorno, si aynu runta ugu tagno. Dib aynu u milicsanno afartii macne ee aynu u keennay macnaha gun, oo aynu ka raadinno Quraanka bal inuu sheegayo afartan macne, iyo weliba sida uu u dhigayo amaba uga hadlayo. Midda koowaadi waa ka dhalashada amaba u dhalasha gobta, iyo weliba gunta. Ummadihii hore bal aynu jalleecno. Tan iyo nebi Nuux bal aynu dhuganno. Kadib markii uu wacdiyey oo waanshey tolkiis iyo beeshii uu ka dhashay bay waxay nebi Nuux ku yiraahdeen, "war ma waxaan ku raacnaa adoo ay gunta kasgaabka ahi kula socoto!" , oo ay ka wadeen dadkii danyarta ahaa ee ahaa dad aan xoolo badan iyo adduun badan haysan, taladana aan waxba la waydiin jirin.

Kibirka iyo qabka ay huwanaayeen ayaa gob-isku-sheegtii ladnayd u diiday inay iyana nebiga aaminaan oo ay warkiisa yeelaan, mar hadday guntii reerku -waa wax-ma-haysatadii- uga hormadhay iimaanka iyo nebiga raaciddiisa. Nebi Nuux baa ugu warceliyey, "yeelkayga ma ahan inaan Ilaahay dadkiisa eryoh", taasoo uu ka wadey dadkii rumeeyey, danyarba ha haadeene. Oo wuxuu isla-weyntii beeshiisa u sheegayaa in gobannimadu ay tahay iimaan, gunnimaduna gaalnimada, adduun yeelkiise!

Dooddan is-la-weynta aadanaha iyo iyo nebiyadii Ilaah soo diray dhexmartay ee yaa goba iyo yaa guna waa ay dheertahay. Meelkastoo nebi Ilaahay kaga warbixiyey Quraanka waad ku arkaysaa, ama duuduub ama iyadoo furfuran. Sidoo kale jawaabta ay nebiyadu ka bixinayaan ayaa marwalba ahayd isku mid: waxay lahaayeen war waxaa goba ninkii Ilaahay yaqaan, waxaana guna ninkii Ilaahay xarigiisa gooyey. Waxaa ugu dambeeyey nebi Maxamed. Waatuu isna yiri:

من بطَّأ به عملُه لم يُسرِعْ به نسَبُه

"Ninkii falxumadiisu la hadho [adduunka], abtirkiisu ma hor marinayo [aakhiro]!"

Wuxuu nebigu leeyahay, ninkii 'laandheerinimo' isufilayow, oo isleh aakhiray wax ka taraysaa arrinkaaga, waad ku hungoobaysaa malahaaga habowga ah.

Halkaas waxaa la inoo sheegay oo dhaxal nebi ah in saddex ka mid afartii macne ee 'gun' lagu qeexay aysan ahayn sida dadka in badan oo ka mid ahi ay isu sheegto. Sidoo kale waxaa la inoo caddeeyey cidda dhabta ah ee gunta ahi in ay tahay ciddii falsami iyo fiicni uur laga waayo, addin laaban iyo uur xun -camal la'aan iyo iimaan la'aan- lagu helo, sida xadiiska nebigaba ku cad.

Ugu dambayn, bal aynu fiirinno macnaha ugu dambeeya ee afaraad. Dadka yaa goba? Waxaa cad in gobtu ay tahay ciddii Ilaahay ka yaabta, oo amarka Ilaahay ku toosan. Waxaa ka loo cad in ciddii Ilaahay ay isa seegaan ay gumoobayso, ama adduun ama aakhiro, mid uun. Arrintan ayaa Quraan iyo weliba warkii Nebiga si aad ah ugu cad. Waxaa ay ku cadday qiso kasta oo ka hadlaysa duulashii iyo ummadihii hore, ee goortay khilaafeen ambiyadii, la rogey. Aakhiro iyo adduunba kala sarraynu waa mid ka dhalanaysa falsamida qofka amaba ummadda, iyadoo laga ambaqaadayo ku dhaqanka iyo dhaqan-ka-yeelashada kitaabka Alle.

# JIIL DHAXLI DOONA BURBUR MISE YAGLEELI DOONA JAMHUURIYAD?

## GO'DOONKA SIYAASADEED EE DHALLINYARADA, IYO LOOLANKA FOG EE QARAN-DHISKA SOOMAALIYA



Dr. Maxamuud Cabdiraxmaan Maxamuud



Xigashada Sawirka: AI

Waxaa jira aamusnaan gaar ah oo ku soo degta dhallinyarada Soomaaliyeed marka aad weydiiso mustaqbalka dalkiisa. Ma aha aamusnaan ka dhalatay aqoon-darro, waa aamusnaanta qof su'aashaas marar badan ka fekeray, marar badanna soo gaadhay natiijo xanuun badan, ka dibna si hoose oo gaar ah go'aansaday in "rajadu" tahay raaxo (luxury) uusan hadda awoodin.

Aamusnaantaasi ma aha dullinimo ama danayn-la'aan. Waa dhawaqa go'doonka siyaasadeed, waana dhibaatada siyaasadeed ee ugu cawaaqibka xun ee maanta haysata Soomaaliya iyo jiilka soo koraya. Waxaa la dhihi karaa dhibaatadani waxay ka saamayn weyn tahay khilaaf kasta oo doorasho, iska hor imaad qabiil, ama ismari-waa dhex mara dowladda dhexe iyo maamul-goboleedyada. Sababtoo ah dhibaatooyinkaas kale waa kuwo xilliyeed ah, laakiin dhibaatadan ka irdhowga nidaamyada nolosha waa mid jiil dhan saamayneysa.

## NABARRADA IS-HUWAN

Hadal-haynta siyaasadeed ee Soomaaliya waxaa si weyn u hareeyey dhibaatooyin muuqda una baahan in si degdeg ah xal loogu helo sida: amniga koonfurta, dhismaha nidaamka federaalka oo aan weli dhammaystirnayn, xiisadda u dhaxaysa Muqdisho iyo maamullada xubnaha ka ah, iyo shakiga joogtada ah ee laga qabo hufnaanta doorashooyinka. Waa dhibaatooyin dhab ah oo u baahan in madaxdu ay xil weyn iska saaraan una helaan xal deg deg ah.

Hase yeeshee, dhibaatooyinkaas dhammaantood waxaa ku hoos qarsoon dildillaac aan loo jeedin, kana qoto dheer dhibaatooyinka muuqda: waa jiil dhan oo aqoon leh, karti leh, damiir leh, kuwaas oo soo gaadhay natiijada ah in nidaamka siyaasadeed, bulsho iyo dhaqan-dhaqaale ee hadda jira uusan iyaga u adeegayn, matalin, waxna aysan ka beddeli karin. Waxay u muuqdaan kuwo daawadayaal ah. Waxay bixiyaan faallooyin. Way haajiraan marka ay helaan fursad. Marka ay waayaanna, waxay ka fariistaan ka qayb-galka guud ee nolosha siyaasadeed ama dhaqan-dhaqaale, iyaga oo caqligooda iyo xooggooda u weeciya sida ay qof ahaan isu maarayn lahaayeen, halka ay qayb ka noqon lahaayeen dhismaha qaranka iyo u a deeggidda bulshada.

Dadka iyagu ku xeel-dheer cilmiga siyaasadda waxay arrintan ugu yeeraan "go'doon ama ka irdhow siyaasadeed (Political Alienation). Go'doonkan siyaasadeed oo macnahiisu yahay in ay ka go'an yihiin ama ka irdhoobaan dareenka qofka kaga aaddan nidaamka iyo nolosha siyaasadda taagan. Go'doonkan wuxuu ka dhashaa farqiga weyn ee u dhexeeya waxa uu qofku ka filayo dowladnimada iyo waxa dhabta iyo waaqica ah ee uu ku nool yahay (Expectation Gap). Soomaaliya gudaheeda, farqigaas waxaa sii ballaariyey tobannaan sano oo fashil hay'adeed ah (Institutional Failure), musuqmaasuq caadi iska noqday, doorashooyin u muuqda nidaam la iska maro oo aan isbeddel keenayn, iyo dhaqan siyaasadeed oo dhiirrigeliya daacadnimada qabiilka iyo kooxaysiga, halkii wax lagu dooran lahaa kartida, aqoonta qofka iyo mabaadi'da uu xambaarsan yahay ama barnaamijka siyaasadeed ee ka go'an in uu fuliyo.

Cawaaqibka ka dhasha arrintani ma aha mid dhalanteed ah. Marka dhallinyarada kartida lihi ay ka haraan nolosha bulshada dhexdeeda, tayada hay'adaha qaranka ayaa hoos u dhaca. Marka fagaaraha siyaasadda ay ka baxaan kuwa leh anshaxa iyo damiirka sare, waxaa buuxiya kuwa leh tayada iyo kartida ugu hooseeysa. Go'doonka siyaasadeed waa mid is-quudiya: mar kasta oo maamulku xumaado, dadka ugu wanaagsan ayaa ka fariista; mar kasta oo dadka wanaagsan ka fariistaanna, maamulku waa uu ka sii daraa. Soomaaliya waxay ku dhex jirtay meertadan xun in ka badan soddon sano.

Su'aasha mudan in la isweyddiiyo ee maqaalkan xudunta u ah: Meertadaas ma la jabin karaa? Yaase jabin karaa?

## XALKA OO LAGA DOONO MEEL UUSAN JIRIN

Madaxda siyaasadeed ee Soomaaliya, marka si guud loo eego, waxay ku khaldan yihiin sida ay u fasirtaan go'doonka dhallinyarada (Political Alienation) ee siyaasadda. Jawaabaha laga bixiyo waa kuwo dul ka xaar ah oo aan qoto dheerayn sida in kooto dhallinyarada loogu daro xeerarka, in la-tashayo lagala sameeyo dhallinyarada, in laga shaqaalaysiiyo wasaaradaha, iyo in madaxdu ay baraha bulshada kala hadasho dhallinyarada. Arrimahaasi ma aha kuwo aan faa'iido lahayn ama aan habboonayn in lagu tallaabsado, laakiin waxay daweynayaan calaamadaha cudurka (symptoms) iyada oo la iska indho-tirayo cudurka dhabta ah ee jira.

Cudurka dhabta ah ma aha matalaad la'aan. Waa xanuun ka dhashay in ay dareemaan waxtar-la'aan (crisis of perceived efficacy). Dhallinyarada Soomaaliyeed ma dareemayaan in laga saaray siyaasadda oo sabab looga dhigay in ayan haysan kuraas keliya. Waxay dareemayaan in ka go'doomeen

siyaasadda sababtoo ah waxay rumeysanyihiin in miiska go'aan qaadashada aan wax dhab ah lagu gorfayn, ama haddii ay fariistaan aysan waxba ka beddeli karin xaaladda.

In la fahmo farqiga labadaas arrimood aad ayay muhiim u tahay. Kooto dhallinyaro oo lagu daro baarlamaan aan shaqaynayn daawo uma ahan go'doonka siyaasadeed. Waxaaba dhici karta inay kasii darto maxaa yeelay waxaa dhici karta in dhallinyaro rajo lahayd ku dhex milmaan nidaamkii eexda iyo siyaasaddii riwaayadda ahayd ee markii horeba go'doonka keentay. Waxa loo baahan yahay ma aha dhallinyaro badan oo lagu dhex daro nidaamka jira. Waxa loo baahan yahay waa jiil u diyaarsan inay beddelaan nidaamka hadda jira una beddelaan mid ka waxtar iyo caddaaladsan, kana tarjumaya maslaxadda ummadeed iyo horumarka dalka.

Diyaarinta dhallinyaro noocaas ahi waa mashruuc muddo dheer qaadanaya. Waa mashruuc aan sawirrada baraha bulshada lagu qurxinayo aan ahayn. Waa mashruuc ka wayn in lagu galo olole doorasho ama muddo xileed afar sano ah. Waa mashruuca keliya ee xallin kara dhibaatada heerka ay hadda taagnan tahay iyo in rajada dhallinyarada la soo celiyo.

## MAXAYNU U BAAHANAY IN AAN OGAANNO?

Si loo jiheeyo dhallinyarada, dibna loogu soo nooleeyo ruuxdooda ka qaybqaadashada nolosha bulshada iyo tan siyaasadda waa in lagu baraarujiyo dhowr doodood oo muhiim ah:

**Dooda koowaad: Kala Soocidda Siyaasadda iyo Siyaasiyiinta**

Waa kala-soocidda aqooneed (epistemological separation) ee u dhexaysa siyaasadda iyo siyaasiyiinta. Dhallinyarada Soomaaliyeed, sida kala-sooociddaani ku doodayso, waa in lagu tababaro inay kala gartaan siyaasadda cilmi ahaan oo lagu qeexi karo in ay tahay aqoonta ku saabsan sida loo agaasimo nolosha bulshada, loo maareeyo hantida dadweynaha, loona abuuro isla-xisaabtan dhab ah, iyo shakhsiyaadka hadda siyaasadda sida xun u adeegsanaya (siyaasiyiinta maanta) – in aan qori iyo qiiqiis la isla tuurin. Kala-sooociddani ma aha mid fudud. Waa aasaaska fikirka qofka ku dhiirrigelinaya ka-qaybgal nolosha siyaasadeed iyo dhaqan-dhaqaale ee bulshada halkii uu ka quusan lahaa. Qofka dhallinyarada ah ee go'aansada in maamulku laftiisu yahay wax been abuur ah, wuxuu ka baxayaa masraxa waligiis. Laakiin qofka garawsada in dadka iyagu gacanta ku haya ay yihiin kuwa ku fashilmay waajibaadkoodii, qofkaasi wuxuu noqonayaa mid u oomman barashada cilmigaas, isaga oo isu diyaarinaya inuu si ka fiicnaado siyaasiyiinta maanta, dhaqana geliyo aqoonta dhabta ah ee cilmiga siyaasadda (in aan la isla tuurin biyaha iyo baaldiga).

Xaaladda maanta lagu jiro ee Soomaaliya, in dhallinyarada lagu wacyi geliyo fikirkan in la kala sooco siyaasadda iyo siyaasiyiinta, in aan qori iyo qiiqiis la isla tuurin waxay leedahay ahmiyad gaar ah. Sheekada ah "siyaasaddeennu asal ahaan way xumaatay" oo mararka qaarkood la huwiyo in ay ku sal leedahay dhaqan ama taariikh waa nooc ka mid ah is-fashilinta (Self-defeat) una adeegaysa kuwa ka faa'iideysta xaaladda hadda jirta. Fashilka hay'aduhu (Institutional Failure) ma aha masiir qoran. Waa cillad ka dhalatay sidii loo dhisay. Cilladaha noocaan ah waa la beddeli karaa, dibna waa loogu dhisi karaa si ka hufan, kana waxtar badan.

**Doodda Labaad: Jihaynta Awoodda Dhallinyarada**

Doodda labaad ee muhiimka ah waxay khuseysaa jihaynta awoodda iyo tamarta dhallinyarada. Dooddani waxay salka ku haysaa falsafadda "Stoic Philosophy" iyo cilmiga "Neuroscience": carada iyo xanaaqa joogtada ah ee aan jihaysnayn ee laga qaado xaaladaha siyaasadeed ee qofka gacantiisa ka baxsan ama uusan wax ka qaban karin ma aha oo keliya xaalad qofka ku beeraysa quus keliya ee waa xaalad xanuun-maskaxeed qofka ku reebi karta raad xun. Walwalka siyaasadeed ee joogtada ahi wuxuu wiiqaa awoodda caqliga sida falanqaynta, qorshaynta fog, iyo xakamaynta dareenka qofku ugu baahnaa in uu sameeyo isbeddel dhab ah. Dooddan macnaheedu ma aha baaq ku aaddan aamusnaan ama is-dhiibid. Waa baaq ku aaddan dulqaad marxaladeed oo looga jeedo in qofku xoogga saaro dhisidda aqoontiisa iyo kartidiisa qofeed ka hor inta uusan isku dayin inuu nidaamka oo dhan ka hor yimaado. Waxay ka dhigan tahay in qofku ku mashquulo waxa uu qaban karo (What you can control) oo uusan aad tamartiisa iyo awooddiisa maskaxeed ugu bixin arrin uusan waxba ka qaban karin (Out of control).

Dhallinyarada Soomaaliyeed waxay uga dhigan tahay: afarta saacadood ee maalin kasta lagu bixiyo doodaha kulul ee baraha bulshada ee ku saabsan federaalka ama doorashada, waa afar saacadood oo aan lagu bixin qofku inuu noqdo dhaqaale yahan, looyarnimo, injineernimo, ama maamulihii loo baahnaan lahaa si loo maareeyo nidaam iyo dowlad shaqaynaysa.

Carada iyo niyad jabka ku saabsan burburka dawladeed iyo musuqmaasuqa waa la fahmi karaa, laakiin waxaan la fahmi karin in qofka dhallinyarada ahi waqtigiisa iyo tamartiisa ku dayaco arrimo uusan waxba ka qaban karin ama wax ka bedeli karin – waa istaraajiyad ma dhalays ah.

**Doodda saddexaad: Helidda Hoggaankii loo Baahnaa**

Waxaa muhiim ah in aan loo arag firaaqa siyaasadeed ee maanta jira in ay tahay musiibo keliya oo loo arki karo in ay tahay fursad qaali ah oo lagu heli heli karo hoggaankii loo baahnaa. Marka dib loo raaco taariikhda dunida, halyayga iyo hoggaanka fiicani ma yimaado xilli barwaaqo iyo nabadi jirto. Halyaygyu wuxuu ka dhashaa musiibada iyo dhibaatada, wuxuu kasoo dhex baxaa burburka iyo marka ay jirto xaalad niyad jab baahsan. Xilli kasta oo ay dhacdo fashil dawladeed ama siyaasadeed oo aad u ba'an, waxaa ugu dambayn ka dhasha jiil aasaasayaal ah — dad ka soo dhex baxa burburka iyagoo leh damiir cad oo diidaya wixii fashilmay iyo karti aqooneed oo ay ku dhisaan wixii loo baahnaa.

Jiilka aasaasayaasha Soomaaliya maanta way nool yihiin. Waxay fadhiyaan fasallada Muqdisho, Hargeysa, iyo Garoowe. Waxay ka shaqeynayaan xafiisyada qurba-joogta ee Minneapolis, London, iyo Nairobi, iyagoo urursanaya xirfado ay dhici karto inay dalka dib ugu soo celiyaan. Waxay maamulaan ganacsiyo yaryar oo ka samatabaxay xaaladda fawdada ee aysan jirin qawaaniin ganacsi oo shaqaysa. Waxay wax ka baraan dugsiyo aan qalab iyo agab midna haysan iyagoo muujinaya karti iyo dadaal ka badan intii laga fili karay.

Dhallinyarada maanta inay noqdaan ama isu diyaariyaan inay noqdaan jiilka aasaasayaasha Soomaaliya waxay ku xiran tahay waxa ay qabtaan tobanka sano ee soo socota iyo in madaxda iyo aqoonyahannada hadda jira ay yeeshaan xigmaddii iyo garashadii ay ku maalgashan lahaayeen diyaarintooda jiilka mustaqbalka.

# MAXAY MADAXDA SIYAASADDU UGU QAAMAYSAN YIHIIN JIILKA BERRITO?

Madaxda siyaasadda Soomaaliya waxay soddonkii sano ee la soo dhaafay ku shaqaynayeen male ah: in kartida dadku (human capital) tahay wax iska yaalla oo ka baxsan go'aannada siyaasadeed, lagana faa'iidaysan karo markii loo baahdo. Xaqiiqdu waa lidka arrinkaas. Kartida dadku waa waxa ugu saamaynta badan nolosha qaranka. Waxay ku kortaa jawi ay jirto kalsooni hay'adeed, maalgashi waxbarasho, iyo fursad lagu helo karti iyo aqoon. Waxay ku daciiftaa, ugu dambayntiina ku burburtaa, jawiga musuqmaasuqa, eexda, iyo fashilka hay'adaha.

Qof kasta oo dhallinyaro ah oo karti leh oo qaxa ama ka taga dalka sababo la xiriira in ay waayeen waddo ay nidaamka ku dhex galaan ama kartidooda uga faa'iideeyaan iyagoon damiirkooda iyo dadnimadooda lumin waa khasaare hantiyeed oo aan laga soo kaban karin soona gaaray qaranka iyo dawladnimada Soomaaliyeed. Arday kasta oo jaamacadda ka soo baxay oo meel lagu geeyey qabiil dartiis iyo eex halkii lagu xulan lahaa aqoon iyo karti qofeed, waa khasaare culus iyo dhaawac soo gaaray dawladnimada iyo qaran dhiska: waa qofkii aqoonta lahaa oo laga tagay, iyo hay'addii qaranka oo laga qadiyey aqoontii ay u baahnayd.

Waxa jiilka hadda siyaasadda haya laga rabo ma aha eex iyo gacan-ku-hayn (patronage). Ma aha kooto dhallinyaro. Ma aha khudbado ku saabsan doorka dhallinyarada ee mustaqbalka. Waxay ku qaamaysan yihiin in ay dhisaan ama yagleelaan hufnaan hay'adeed (Institutional Integrity) oo ah mabda'a aasaasiga ah ee lagu maamulayo hay'adaha dadweynaha si loo dhiirrigeliyo kartida, loona fuliyo xeerarka si loo siman yahay iyadoo fursad la siinayo qofkasta oo mudan inuu kor u kaco. Tallaabadani ma aha riyo (idealism). Waa shuruudda ugu yar ee lagu hanan karo dhallinyarada leh aqoonta iyo kartida aan looga maarmin mustaqbalka Soomaaliya.

# LOOLANKA FOG (THE LONG GAME)

Dhaqanka siyaasadeed ee Soomaaliya wuxuu si la fahmi karo ugu mashquulsan yahay arrimaha wakhtiga dhow. Marka amnigu jilicsan yahay, dakhliga dowladda uu yar yahay, isbahaysiyada siyaasadeedna ay markasta isbeddelayaan, qorshaynta muddada fog waxay u muuqataa raaxo aan la gaari karin. In sidaa loo fakaro waa dabin iyo ilduuf siyaasadeed.

Waddamada ku guuleystay inay ka gudbaan dowlad-nimo jilicsan una gudbay dowladnimo shaqaysa burbur iyo dagaal sokeeye ka dib sida Rwanda, Georgia, Estonia, iyo Botswana — waxay wadaagaan hal sifo: xilli adag oo taariikhdooda ka mid ah, hoggaankoodu wuxuu qaatay go'aanno aan faa'iidadooda la arkayn toban ama labaatan sano. Waxay maalgashadeen waxbarashada. Waxay hay'adeeyeen kartida iyo aqoonta (merit). Waxay dhiseen nidaam maamul oo ka cimri dheer hoggaamiyeyaasha markaas talada haya. Waxay aqbaleen khasaare siyaasadeed oo wakhti dhow ah si ay u helaan faa'iido hay'adeed iyo dhismo dal iyo dad wakhti dheer ah.

Soomaaliya maanta waxay maraysaa xilli kala guur ah. Jiilka hadda dugsiyada iyo jaamacadaha ku jira waxay soo geli doonaan shaqada iyo fagaaraha siyaasadda shanta ilaa shan iyo tobanka sano ee soo socota. Su'aasha ku saabsan nooca ay noqon doonaan - inay noqdaan kuwo leh aqoon iyo karti madax-bannaan ama kuwo ku tiirsan dad kale, kuwo damiir leh ama kuwo quustay, kuwo hay'adaha dhisi kara ama kuwo iska noolaanda uun - jawaabteeda waxay ku xiran tahay go'aannada ay hadda qaadanayaan macallimiinta, madaxda siyaasadda, bulshada rayidka ah, iyo dhallinyarada laftooda.

# GUNAANAD: DAWLADNIMADA LAMA DHAXLO EE WAA LA DHISAA

Go'doonka siyaasadeed ee dhallinyarada Soomaaliyeed ma aha wax qarsoon. Waa fal-celin caqli-gal ah oo ka timid jiil arkay rajooyin dawlad dhiska iyo siyaasadda dalka inta badan fashilantay welina aan loo hayn sabab lagu qanci karo oo ay ku rumaystaan in markan ay ka duwanaan doonto kuwii hore.

In dhallinyarada la siiyo sabab ay ku qancaan waa mas'uuliyad saaran qof kasta oo haya xil kasta oo lagu kalsoon yahay ee dalkan — hadday tahay mid siyaasadeed, aqooneed, waxbarasho, ama mid bulsho. Ma aha hadal uun. Waa iyada oo loo marayo hab-dhaqan hay'adeed (Insitutional Behaviour) muuqda oo abaal-mariyana kartida, ciqaabaya musuqmaasuqa, u diyaariya goobo ay jiilka soo socda ku koraan iyadoo lagu qiimeynayo waxa ay yaqaannaan iyo waxa ay qaban karaan.

Burburku waa dhab. Su'aashu waxay tahay sidee looga kabanayaa ama burburkaas loogu dul dhisayaa?

Jawaabta waxaa iska leh jiilka soo koraya ee looga fadhiyo in ay beddelaan qaab-fakarka maanta. Waxa ugu yar ee intayada kale aan samayn karno waa inaan ka fariisanno ama ka fogaanno in aan jiilkaas xagal-daacinno.

# DHUXUL DAMBAS HUWAN:

## DOORASHOOYINKA SOOMAALIDA: SHULUGGII REERKA OO ISU ROGAY KELITALIS



Muxiyadiin Maxamed Cabdi



Xigashada Sawirka:AI

Dalnimadu waa aqoonsiga iyo jiraalka ay ummadi kaga soocan tahay dadyowga kale; waa deegaanka iyo hiddaha uu qofku ka dhex helo abtirsigiisa iyo nuxurka dadnimo. Dowladnimaduna waa weeleeyaha iyo ilaaliyaha dalnimadaas. Marka la helo dhul, dad, maamul, hay'ado danguud, xukuumad, ciidan, iyo dastuur hagaya, ayay dowladnimadu taabbagashaa—waana tiirar sugan oo aan si dhib yar u dhalanrogmin.

Xukuumaddu waa qayb ka mid ah nidaamka dowladnimada, waana mishiinka fulinta ee loogu talaggalay inuu masiirkaas hirgeliyo. In kasta oo af Soomaaligu xoogaa ka arradan yahay eraybixinnada dowladeed, haddana inta badan "Xukuumad" waxaan u naqaan oo keliya Golaha Fulinta; hase yeeshee, asalka eraygan oo Carabi ah wuxuu isku dhex koobayaa hay'adaha Sharcidejinta, Garsoorka, iyo Fulintaba.

Dastuurku waa laf-dhabarta dowladnimada, doorashaduna waa hab-raac uu dastuurkaas qudhiisu amrayo si awoodda loo maamulo.

## IS-KHILAAFKA SHARCIGA IYO WAAQICA SOOMAALIYA

Sida uu dhigayo dastuurka, Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaal ah oo dimuqraaddi ah. Waxaa ka dhex jira nidaam ay ku wada heshiis yihiin dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada (marka laga reebo Somaliland oo xaalad gaar ah mudan). Dastuur kasta oo maanta dalka ka jira wuxuu qeexayaa nidaam dimuqraaddi ah, laakiin hab-dhaqanka hoggaamiyeyaasha qaabilsan maamulka wuxuu si cad u gudbinayaa kelitalisnimo dhab ah.

Marka ay doorasho ka dhacayso deegaannada Soomaalida, qofku wuxuu ku qancayaa habka wadar-oggolka ah iyo hannaanka ay wax u socdaan balse sannad kaddib, marka aad aragto isbeddelka ba'an iyo isla-waynida qofkii la doortay, waxaad isweydiinaysaa: "Kani ma yahay kii shalay la doortay, mise waa nin kale oo boob iyo xoog ku qabsaday kursiga?" Su'aashu waxay tahay, xorriyaddii aaway?

## ARAGTIYAHA SIYAASADEED: DIMUQRAADIYAD MAQAARSAAR AH

Aqoonta siyaasadda waxaa jirtay aragtiyo si saynis ah u qeexaya nidaamyada dhab ahaantii kelitaliska ah laakiin dibadda ka xidhan dhar dimuqraaddi ah. Habkan waxaa loo yaqaannaa:

**1. Kelitalisnimada ku dhex dhuumata Dimuqraadiyadda Rasmiga ah**

(Dhuxul Dambas Huwan)

Qoraaga caanka ah ee Fariid Sakariya, buuggiisa "Mustaqbalka Xorriyadda", wuxuu ku falanqeeyay arrinkan isagoo adeegsaday eraybixinta: "Dimuqraadiyadda ka arradan xorriyadda" (Illiberal Democracy). Tani waa nidaam lagu heshiis yahay oo keliya maalinta codeynta iyo sanduuqa, laakiin maalinta xigta uu qofkii soo baxay sidii uu doono u maamulo shacabka iyo dalka.

Xaaladdan waxay dhalataa marka geeddi-socodka doorashada ay afduubaan siyaasiyiin ujeeddadoodu tahay oo qura inay xukunka hantaan. Waxay ku gorgortamaan qaabka doorashadu u dhacayso, iyagoo bulshada u qaybiya beelo iyo koox-koox si ay masiirkooda ugu adeegsadaan danahooda gaarka ah. Maadaama aan markii horeba loo tartami jirin dowladnimo dhab ah, qofka guuleysta wuxuu kursiga u arkaa "qayb-libaax" oo uu ka helay dhaxalkii aabihii oo la kala boobayay; sidaas darteed wuxuu u dhaqmaa si kasta oo ay naftiisu la qummanaato!

**2. Kelitalisnimada Debecsan**

Qoraagii caanka ahaa ee reer Maraykan, Aleksis Do Tokfiil (Alexis de Tocqueville), wuxuu buuggiisa "Dimuqraadiyadda ka jirta Maraykan" ku qeexay nooc cusub oo kelitalisnimo ah oo uu u bixiyay: "Dangiigga Xukun ee Debecsan" (Soft Despotism). Waa maamul kelitalis ah oo huwan hannaanka dimuqraadiyadda, wuxuuna ka eegay laba xagal:

- Sad-bursiga Aqlabiyadda: In nidaamku u xaglinayo keliya cidda codka badan haysata, iyadoo meesha laga saarayo xuquuqda dadka tirada yar (inkastoo qodobkani uusan ahayn diiradda qoraalkan).
- Dul-ka-xaadinta Dimuqraadiyadda: Waa marka uu siyaasigu u adeegsado magaca dimuqraadiyadda danihiisa gaarka ah, isagoo curyaaminaya bulshada iyo cid kasta oo uu u arko inay halis ku tahay kursigiisa.

**Shanta Astaan ee Kelitalisnimada Soomaalida**

Astaamaha lagu garto kelitalisnimada ku hoos dhuumata dimuqraadiyadda waxay maanta si cad ugu muuqdaan nidaamyada ka jira dalka Soomaaliya, waxaana ka mid ah:

1. **Dimuqraadiyad Maqaarsaar ah:** Doorashooyinka Soomaalidu badankood waxay ku dhacaan wadar-oggol, natiijadana waxaa aqbala tartamayaashii laga guulaystay. Iyadoo

taasi jirto, haddana qofka soo baxa wuxuu noqdaa mid siday la tahay u adeegsada awooddii weynayd ee gacanta loo geliyay.

2. **Farataysiga iyo Beddelka Dastuurka:** Maadaama uu dastuurku yahay tiirka ugu weyn ee dowladnimada, faragelintiisu waa calaamadda koowaad ee kelitalisnimada. Tani waa mid lagu yaqaan badi madaxda Soomaalida; waxaan tusaale u soo qaadan karnaa hab-dhaqankii Madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni ee Puntland iyo tillaabooyinka hadda taagan ee Madaxweynaha Dowladda Federaalka Soomaaliya Xasan Shiikh Maxamuud uu ku beddelayo dastuurkii 2012 ee lagu wada heshiiyay.

3. **Aamusinta Codka Mucaaradka:** Waa astaanta saddexaad. Marka aad u kuurgasho xaaladda dalka, waxaad arkaysaa in garoonka siyaasadda laga cidhiidhyay mucaaradka, lana diiddan yahay inay helaan maydaan xor ah oo ay ku muujiyaan fikradahooda.

4. **La-dagaallanka iyo Iibshada Saxaafadda Xorta ah:** Iyadoo maamuladu ku dhawaaqayaan inay difaacayaan xorriyadda hadalka, haddana maalin walba waxaa la xiraa lana jirdilaa suxufiyiinta. Sidoo kale, xukuumaduhu waxay lacag iyo laaluush ku iibsadaan warbaahinta madax-bannaan. Tusaale ahaan, xukuumaddii Deni waxay leedahay warbaahintii Deparaani Media iyo weriye Faarax Gaylan, halka xukuumadda Xasan Sheekh ay iibsatay bogagga dhowr ah iyo wariyeyaal ay ka mid yihiin Hanoolaato iyo Cali Aadan Muumin.

5. **Bahalogelinta Mucaaradka:** Hoggaamiyaha kelitaliska ahi wuxuu had iyo jeer jeediyaa khudbado uu isku tusaaleynayo inuu yahay "Badbaadiyaha keliya ee Shacabka", halka uu dadka ka soo horjeeda ku tilmaamo cadow u tafo-xaytay inay dalka ka ridaan qar iyo haadaan.

## FARQIGA IYO ISU-EEKAANSHAHA KACAANKII HORE IYO MAANTA

Kelitaliskan casriga ahi ma baabi'iyo dastuurka gebi ahaanba, balse wuxuu ka beddelaa qodobbada xaddidaya awooddiisa ama kursiga ka qaadi kara. Wuxuu xukuumadda ka dhigaa mid ku dhex nool "madaxa hal qof", halka hay'adihii kale ee dowladda ay noqdaan kuwo fadhiid ah oo hawlgab ah. Wuxuu u takri-falaa hantida iyo awoodda dalka, isagoo xilalka u magacaaba si shakhsi ah, miisaaniyaddana u isticmaala siday la tahay—isaga ayaa ah garsooraha, isaga ayaana ah dacwoodaha!

Haddaba, marka aan eegno waaqiceenna, farqiga keliya ee u dhexeeya Kacaankii uu hoggaaminayay AHN Maxamed Siyaad Barre iyo xukuumadaha maanta jira waa **habka ay xukunka ku yimaadeen.** Kacaanku wuxuu talada ku qabsaday afgambi iyo qori, halka madaxda maanta ay ku yimaadaan doorasho wadar-oggol ah. Wixii intaas ka ulul, waxay ka siman yihiin wax kasta: talada dalka oo ku ururtaba gacanta hal qof iyo hay'adihii dowladda oo wada curyaamay.

## GUNAANAD: MAXAY KU BILAABATAA DAAWEYNTU?

Xalka arrinkani wuxuu ku jiraa badbaadada iyo baraarugga saamilaha ugu weyn ee dowladnimada, kaas oo ah **Dadweynaha Soomaaliyeed.**

Haddaba, inta ay qabyaaladdu tahay halbeegga keliya ee ay bulshadu ku miisanto aayaheeda iyo masiirkeeda, siyaasiyiintu waxay sii wadayaan inay ka ganacsadaan mustaqbalka umadda. Afartii sanaba mar ayay ku heshiin doonaan qaabka ay kursiga u kala boobi lahaayeen, qofka soo baxaana wuxuu dalka ka sii miisi doonaa halkii uu kii ka horreeyay kaga tegay—ama xaaladda ka sii dari doona.

# QAADKA IYO SAAMAYNTIISA BULSHADA:
## DHIBAATADA TAAGAN IYO BAAHIDA WACYIGELINEED (QAYBTA 2-AAD)



Dr. Cabdinaasir Jaamac Warsame Islaam



Xigashada Sawirka: Reuters

Miyir-doorsoomku ma aha oo keliya lumitaan maanka ah, laakiin waa duni mugdi ah oo si tartiib-tartiib ah u gasha qoyska, dhaqaalaha, iyo caafimaadka bulshada. Geedka Jaadka (Qaadka), oo maanta dhibaato baaxad leh ku haya malaayiin qof oo ku nool Geeska Afrika iyo Caalamka, wuxuu noqday aafo weyn oo u baahan indho furan iyo baaris dhab ah. Maqaalkan, waxaan qaybtiisa labaad ku lafaguri doonnaa dhibaatooyinka caafimaad, aragtida qotada dheer ee diinta Islaamka, saamaynta dhaqaale ee ba'an, iyo xaaladaha cilmi-nafsiga ah ee uu maro qofka la qabsada masiibadan geedka u eg.

I. Xididaadda Caafimaad-Darrada: Maxay Sayniska iyo Cilmi-baaristu Sheegeen?

Ma jiro shaki laga qabo in Qaadku uu yahay mashiin soo saara cudurro iyo bugtooyin kala duwan. Walxaha kiimikada ah ee ku jira caleenta jaadka, gaar ahaan maaddada Cathinone, waxay si toos ah u saameeyaan Habdhiska Dareen-wadka Dhexe (Central Nervous System), iyadoo beddelaysa habka ay kiimikooyinka maskaxdu u shaqeeyaan.

Haddaba, marka si cilmiyaysan loo eego, jirrooyinka ka dhasha jaadka waxay u kala baxaan qaybaha ugu muhiimsan ee jirka:

## 1. HABDHISKA DHEEFSHIIDKA IYO AFKA

Cunista jaadka waxay keentaa abaar dhanka dheefshiidka ah. Maaddada Tannins oo ah curiye wax toobta (qaabidah) oo jaadka ku jirta heerkeedu wuxuu gaaraa (7-14%). Tani waxay keentaa:

- Calool istaag daran (Constipation): Kaas oo ugu dambayn isu beddela Baabasiir (Hemorrhoids).
- Kansarka Afka (Oral Cancer): Baaris lagu sameeyay gobolka Casiir ee Sacuudiga (Soufi, 1991) ayaa caddaysay in dadka jaadka cuna ay aad ugu nugul yihiin kansarkan.
- Cirrid Barar iyo Ilko Jajab: Jaamacadda Sanca ee dalka Yaman (Al-Qarbi) waxay ogaatay in 35% dadka jaadka cuna uu cirridku bararo, marka la barbardhigo 8% oo kaliya dadka aan cunin.
- Cunto-diido (Anorexia): Qofka wuxuu dareemaa dharag beenaad, isagoo muddo dheer cunto la'aan joogi kara, taas oo burburisa Nidaamka Difaaca Jirka (Immune System).

## 2. HABDHISKA WAREEGGA DHIIGGA IYO WADNAHA

Kicinta uu jaadku kiciyo neerfaha waxay keentaa dhiig-kar joogto ah (Elevated Blood Pressure), garaaca wadnaha oo kordha, neef tuur badan, iyo jirrooyin kala duwan oo wadnaha ku dhaca. Qofka waxaa kale oo dhibaya jir kulayl iyo dhidid joogto ah.

## 3. KELYAHA IYO DHIBAATOOYINKA JINSIGA

- Kaadida: Qofka jaadka cuna wuxuu la kulmaa kaadi ku dhag (Inhibition of micturition) ama kaadi xad-dhaaf ah (Diuresis) oo ka dhalata cabidda biyaha badan iyo shaaha xilliga fadhiga.
- Tabar-yari Jinsi: Jaadku wuxuu hoos u dhigaa rabitaanka iyo awoodda jinsiga (Sexual Drive), wuxuu keenaa manida oo iska qubata, wuuna hoos u dhigaa bacriminta ragga iyo dumarka (Loss of Fertility). Ragga da'doodu tahay 35-40 sano ayay ku keentaa dhibaato bulsho oo dhanka qoyska ah.

## 4. CAAFIMAADKA HOOYADA IYO DHALLAANKA

Cilmi-baaris ay samaysay haweenay u dhalatay dalka Switzerland oo la yiraahdo Ana, ayaa muujisay in hooyooyinka jaadka raamsada ay caanuhu ku yaraadaan naaska, carruurta ay dhalaanna ay noqdaan kuwo weyd ah, daciif ah, dhiig yar, oo jirkoodu dhisma xun yahay.

**II. Triad-ka Caafimaadka ee Islaamka iyo Dhawrista Jirka**

Islaamku waa diin caafimaad iyo fayoobi, wuxuuna si adag u xarrimay wax alla wixii garaadka, caqliga, iyo maanka dooriya sida xashiishka, kookeynta, khamrada, iyo qaadka. Caalimka weyn ee Ibnul-Qayim (1292–1350 C.E.) wuxuu sheegay in sixada iyo caafimaadka jirka uu ku taagan yahay saddex saldhig, kuwaas oo dhammaantood laga dhex helo Qur'aanka Kariimka ah:

1. **Dhawrista Caafimaadka Jirka (Preventive Medicine):** Waxaa laga dhex helaa Aayatul Sowm (Suurat Al-Baqarah: 184), halkaas oo Ilaahey u oggolaaday qofka buka iyo kan safarka ah inay afuraan si ay u dhawraan awoodda jirka.

2. **In laga jaro nafta wixii dhibaya (Abstaining from harm):** Waxaa laga dhex helaa Aayatul Wuduu (Suurat An-Nisaa': 43), oo banneysay tayammumka (ciidda) haddii isticmaalka biyo uu waxyeello u geysanayo qofka jirran.

3. **In jirka laga saaro sunta iyo walxaha faasidka ah (Cleansing pernicious toxins):** Waxaa laga dhex helaa Aayatul Xaj (Suurat Al-Baqarah: 196), oo u banneysay qofka dhibku madaxa kaga jiro (sida injirta) inuu xiiro madaxiisa isagoo ixraaman, si ay u furmaan daldaloollada maqaarku, uumiguna u baxo.

Nasiib-darro, dadka jaadka cuna waxay jidka u xiraan toban waxyaalood oo haddii jirka lagu celiyo dhib keena, kuwaas oo kala ah: kaadida, saxarada, dhuusada, matagga, shahwada, hurdada, hindhisada, dhiigga xun, baahida, iyo harraadka.

### III. Safarka Caqliga: Saddexda Marxaladood ee Jaadwaluhu Maro

Aqoonyahannada baaray cilmi-nafsiga dadka jaadka cuna (sida Dr. Cabdullaahi S. Cilmi) waxay isku raaceen in qofku uu galo saddex xaaladood oo iska soo horjeeda hal fadhi gudihiis:

- **Xaaladda 1aad (Marqaan / Euphoria):** Waxay timaaddaa 3 saac iyo bar ka dib. Qofka wuxuu dareemaa farax dhalanteed ah, reyn-reyn, iyo hadal-tiro badan (Logorrhea), taas oo ay sababto maaddada Cathinone oo kicinaysa maskaxda.

- **Xaaladda 2aad (Qaadiro / Tension):** Waa marxalad jignaan iyo giifaan ah. Halkan qofku wuxuu noqonayaa mid u oggolaanaya maskaxdiisa inay raadiso jaad kasta oo uu ku heli karo lacag—ha fodateeyo, ha shaxaado, ama ha xado. Waa halka ay isaga midka yihiin jaadka iyo xashiishku, sidii uu Yaxye C. Keenadiid ku qoray Qaamuuska Af-Soomaaliga.

- **Xaaladda 3aad (Dubaab / Murugo):** Waa xaaladda ugu dambaysa ee fadhiga. Waxay wadataa isla-hadal, fakar, bushimaha oo la qanqaniino, qoomamo, shalayto, weji-cabuusnimo, haween-la-dirir, iyo isla-qarow. Siciid Abshir Bacadle wuxuu ku tilmaamay marxaladdan mid qofka ku rida "dubaab joogto ah".

### IV. Masiibada Dhaqaalaha iyo Dilidda Waqtiga

Waqtigu waa raasumaalka ugu qaalisan ee aadanaha, diinta Islaamkuna waxay si gaar ah u weynaysay waqtiga iyo bilaha (sida Bilaha Dayaxa ama At-Towqiit Al-Fidri). Haddaba, sidee buu jaadwaluhu u maareeyaa waqtigiisa?

Xisaabta Lumitaanka Waqtiga:

Haddii qofka jaadka cuna uu fadhiyo 12:00 Duhurnimo ilaa 12:00 Habeenimo, celcelis ahaan saacadaha la lumiyo maalinkii waa 7.2 saacadood.

- Bishii: 210 saacadood.
- Sanadkii: 2,520 saacadood.
- 20 Sano gudihiis: Qofku wuxuu dayacaa 50,400 oo saacadood oo bilaash ah, hantataco iyo dan-la'aan ah!

## MIISAANKA HANTIDA LUMAYSA:

Cilmi-baarisyadu waxay muujiyeen in qofka Soomaaliga ah uu cuno celcelis ahaan 320 garaam (4 Mijin) maalinkii. Bishii waa 9,600 garaam, sanadkiina waa 115,200 garaam. Qofka muddo 20 sano ah jaad cunayay wuxuu calaashaday 2,304 kiilo garaam (ama 2.3 Tan) oo jaad ah!

Lacagta ku baxday miisaankaas baaxadda leh waxay dhalisay masiibo dhaqaale (Diyaacul Maal). Sida uu qoray Maxamed Siciid Ash-Shaybaani, qofka jaadka u go'ay wuxuu diyaar u yahay inuu iibiyo dharkiisa, gogoshiisa, iyo aqalkiisa, carruurtiisana uu gaajo uga tago si uu u helo "waabaayada jaadka." Tani waa nacasnimo iyo jaahilnimo ka hor imaanaysa digniintii Nabiga (NNKH) ee ahayd: "Ummad kasta waxbaa lagu fitneeyaa, ummaddeenna fidnadeedu waa maalka."

### V. Shubhada "Quudka Awliyo" iyo Xaqiiqda Geedka Shaydaanka

Waxaa jira dad jaahiliin ah oo difaaca jaadka, iyagoo keenaya shubhooyin ah in Ilaahey

Qur'aanka ku xarrimay keliya bakhtiga, dhiigga, iyo hilibka doofaarka (Suurat Al-Ancaam: 145), ama dhulka waxa ku jira oo dhan loo oggolaaday aadanaha. Sheekh Al-Bayxaani, kitaabkiisa Islaaxul Mujtamac (Bogga 406-408), wuxuu ku burburiyay shubhadaas in qofka saas u fekeraya uu yahay mid garashadiisu yar tahay, iska indho-tiraya qaynuunka guud ee shareecada ee xarrimaya wax kasta oo khabiith ah ama caafimaadka dhibaya.

Kuwa kale waxay ku andacoodaan in jaadku yahay "Quud Awliyo" oo uu Nabi Khadar uga keenay Buurta Qaaf boqorkii Dul-Qarneyn si ay habeenkii u tukadaan! Kani waa baadil cad. Sida uu sheegay Az-Zubayri, "Qaadku waa shaydaan geed loo eekaysiiyay," wuxuuna qofka u horseedaa cabsi joogta ah, hiyi-raac, iyo xasillooni-la'aan.

### VI. Injirta, Sunta, iyo Halista Kansarka

Dhibaatada jaadku kuma koobna oo keliya caleenta, laakiin meelaha lagu ruto (fadhiyada jaadka) waxaa ku badan Injirta. Injirtu waxay keentaa cudurro khatar ah sida Typhus, Trench fever, iyo Relapsing fever.

Waxa ka sii daran, maadaama jaadka laga cuno keliya caleenta, beeralayda waxay isticmaalaan sun aad u u daran (Insecticide / Fungicide) iyo Hormoono si ay caleemaha uga badbaadiyaan cayayaanka. Suntaas mariidka ah ee isku darsanta waxay ku ururtaa dhiigga qofka jaadka cuna, waxayna keentaa waxa loo yaqaan Doorin Unugeed (Cellular Transformation) oo ah bilowga cudurka guud ee Kansarka (Al-Maqrami, 1987).

## GUNAANAD: SIDEE LOOGA BAXAA GODKA MADOW?

Caafimaadku waa barwaaqada ugu horreysa ee addoonka la weydiin doono maalinta Qiyamaha, sida ku xusan Xadiiskii Tirmidi iyo Ibnu Xibbaan. Sidoo kale, qofna ma dhaqaaqi doono ilaa la weydiiyo afartii waxyaalood: cumrigiisii wuxuu ku dhammeeyay, cilmigiisii, maalkiisii meeluu ka keenay, iyo oogadiisii (jirkiisii) wuxuu ku duugeeyay.

Dadka u jilcay geedka jaadka ee u dhowaaday inay noqdaan sufaho (caqli-gaab) aan maalkooda maamuli karin, waxaa la gudboon afar dawo oo muhiim ah:

1. **Rumeyn dhab ah:** In Illaahey si dhab ah loo rumeeyo.
2. **Barashada Cilmiga Sharciga ah:** Si loo kala barto xalaasha iyo xaaraanta.
3. **Ikhlaas iyo Cibaado:** In cibaadada loo huri Rabbi.
4. **Xusid joogto ah (Dikri):** In Illaahey laga magan-galo shaydaanka iyo dabinadiisa.

Noloshu waa mid keliya, caafimaadkuna waa taaj aan la iibsan karin; intaynaan ku dhiman godka madow ee jaadka, aan u soo laabanno diinteena caafimaadka iyo garashada toosan.

**Qore**: Dr. Cabdinaasir Jaamac Warsame



# WAXBARASHADA PUNTLAND EE MAANTA:

## CAQABADAHA JIRA IYO FURSADAHA ISBEDDELKA




Muxsin Mowliid



**Xigashada Sawirka**: Wasaaradda Waxbarashada

# HORDHAC

Waxbarashadu waa laf-dhabarta horumarka bulsho kasta, waana aaladda ugu muhiimsan ee lagu dhiso jiil leh aqoon, xirfad iyo qiyam sugan. Marka laga hadlayo Soomaaliya guud ahaan, nidaamka waxbarashadu wuxuu kasoo kabanayaa ku dhawaad 30 sano oo burbur iyo kala dambeyn la'aan ah, taas oo si toos ah u saamaysay hay'adihii waxbarashada, manhajkii, iyo tayadii macallimiinta. Intii muddadaas lagu jiray, dadaallada la sameeyay badankood waxay ahaayeen kuwo degdeg ah oo ku saleysan "in wax uun la qabto", halkii laga dhisi lahaa nidaam istaraatiiji ah oo tayo leh, waara, isla markaana la jaanqaadi kara baahiyaha bulshada iyo suuqa shaqada.

Marka si gaar ah loo eego Puntland, inkastoo ay ka jirto xasillooni iyo maamul dhisan marka la barbardhigo qaybo kale oo dalka ka mid ah, haddana nidaamka waxbarashadu wuxuu weli wajahayaa caqabado la mid ah kuwa guud ee dalka, iyo kuwo u gaar ah deegaanka. Puntland waxay sameysay horumar muuqda oo dhanka dhismaha hay'adaha waxbarashada, kororka dugsiyada iyo jaamacadaha, iyo dadaallada lagu horumarinayo maamulka waxbarashada. Si kastaba ha ahaatee, horumarkaasi weli ma gaarsiisna heerka looga baahanyahay si loo daboolo baahida sii kordheysa ee bulshada, gaar ahaan marka la eego kororka tirada dhalinyarada iyo carruurta u baahan waxbarasho tayo leh.

Sidaa darteed, marka laga hadlayo horumarinta waxbarashada Puntland, waa lama huraan in la fahmo saddexda tiir ee lagu cabbiro waxbarashada, kuwaas oo kala ah: helitaanka waxbarashada (access), tayada waxbarashada (quality), iyo maamulka waxbarashada (governance). Fahamka qoto dheer ee saddexdan arrimood iyo sida ay uga muuqdaan Puntland ayaa ah furaha lagu ogaan karo halka ay waxbarashadu marayso, iyo jihada ay u baahantahay in loo jiheeyo si loo gaaro horumar waara.

# XAALADDA HADDA EE WAXBARASHADA

Marka la eego xaaladda waxbarashada ee Soomaaliya guud ahaan iyo Puntland si gaar ah, waxaa muuqata sawir isku dhafan oo ka kooban horumar kooban iyo caqabado waaweyn oo weli taagan. Inkastoo ay jiraan dadaallo la sameeyay sanadihii u dambeeyay, haddana tilmaamayaasha muhiimka ah ee waxbarashada ayaa muujinaya in nidaamku uusan weli gaarsiisnayn heerkii looga baahnaa si loo daboolo baahida bulshada, gaar ahaan marka la eego jiilka sii koraya ee u baahan waxbarasho tayo leh. Fahamka xaaladdan hadda jirta wuxuu u baahanyahay in si qoto dheer loo eego dhowr cabbir oo muhiim ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin helitaanka waxbarashada, heerka aqoonta aasaasiga ah, faqriga aqooneed, iyo awoodda wax-soo-saar ee mustaqbalka.

# 1. HELITAANKA WAXBARASHADA (ACCESS)

Helitaanka waxbarashadu waa cabbirka ugu horreeya ee lagu qiimeeyo nidaam waxbarasho. Xogaha ugu dambeeyay waxay muujinayaan in:

- Keliya 40% carruurta gaartay da'da waxbarashada ayaa dhigta dugsiyada hoose/dhexe, taas oo ka dhigan in ku dhawaad 60% carruurta Soomaaliyeed oo ay kamid tahay Puntland aysan helin waxbarasho rasmi ah.
- Marka la eego heerka dugsiga sare, xaaladdu waa mid ka sii liidata, iyadoo kaliya 10% carruurta gaarta da'daas ay helaan waxbarasho dugsi sarre.

Sidoo kale, sida ku cad warbixinnadii ugu dambeeyay ee UNICEF, in ka badan 3 milyan oo carruur ah ayaa ka maqan dugsiyada (out of school). Waxayna si cad u muujinaysaa farqiga weyn ee u dhexeeya baahida waxbarasho iyo adeegyada la heli karo, gaar ahaan deegaannada miyiga iyo meelaha fog-fog ee Puntland.

# 2. AQOONTA AASAASIGA AH (LITERACY)

Heerka aqoonta aasaasiga ah waa tilmaame kale oo muujinaya tayada waxbarashada. Marka la eego xogta jirta qiyaastii 45% dhalinyarada ayaa awood u leh inay wax akhriyaan waxna qoraan. Si kastaba ha ahaatee, tiradan kuma koobna oo keliya dhalinyarada magaalooyinka, balse waxaa ku jira dhalinyaro badan oo ku nool baadiyaha iyo

tuulooyinka, halkaas oo helitaanka waxbarashadu aad u xaddidan yahay.

Intaa waxaa dheer 65% dadka waaweyn ayaan waligood helin waxbarasho rasmi ah (formal education). Tani waxay muujinaysaa in caqabadaha waxbarashadu aysan ku koobnayn carruurta oo keliya, balse ay si qoto dheer u saameeyeen jiilal badan oo bulshada ka mid ah.

## 3. FAQRIGA AQOONEED (LEARNING POVERTY)

Marka loo eego cabbirrada uu adeegsado Bankiga Adduunka (World Bank), "faqriga aqooneed" waxaa lagu qeexaa heerka ay carruurta 10 jirka ahi ka hooseeyaan heerka ugu yar ee akhris iyo faham.

Xogta la heli karo waxay tilmaamaysaa in Soomaaliya ay ka jirto qiyaastii 90% faqriga aqooneed. Tani waxay ka dhigantahay in inta badan carruurta 10 jirka ah aysan gaarsiisnayn heerka aqooneed ee laga filayo da'dooda. Marka arrintan lagu eego Puntland, waxay si toos ah u muujinaysaa baahida degdegga ah ee loo qabo dib-u-habeyn lagu sameeyo tayada waxbarashada, gaar ahaan heerarka hoose ee aasaaska u ah barashada mustaqbalka.

## 4. WAX-SOO-SAARKA MUSTAQBALKA (HUMAN CAPITAL INDEX)

Cabbirka "Human Capital Index" oo uu isticmaalo Bankiga Adduunka wuxuu qiimeeyaa heerka uu qofku u noqdo mid wax-soo-saar leh marka uu gaaro da'da qaangaarka, iyadoo lagu saleynayo waxbarashada iyo caafimaadka uu helay intii uu korayay.

Marka loo eego xogta keliya 13% carruurta Soomaaliyeed ayaa gaara heer wax-soo-saar buuxa marka ay gaaraan 18 sano iyo wixii ka dambeeya. Halka Marka la barbar dhigo dalalka horumaray:

- Dalka Maraykanka: 75%
- Dalalka Europe: 70%
- Halka Afrikada dhexe ayay xogtu sheegayso 50%

Farqigan weyn wuxuu si cad u muujinayaa in nidaamka waxbarashada ee hadda jira uusan si buuxda u diyaarinayn dhalinyarada si ay u noqdaan kuwo wax ku ool ah oo ka qayb qaata horumarka dhaqaalaha iyo bulshada.

## CAQABADAHA UGU WAAWEYN EE WAXBARASHADA

Inkasta oo ay jiraan dadaallo muuqda oo lagu horumarinayo waxbarashada Puntland, haddana nidaamku wuxuu weli wajahayaa caqabado qaab-dhismeed iyo kuwo tayada ah oo si weyn u saameynaya natiijooyinka waxbarasho. Caqabadahan ayaa si toos ah u taabanaya saddexda tiir ee waxbarashada—tayada, helitaanka, iyo maamulka—waxayna xaddidayaan awoodda nidaamku u leeyahay inuu soo saaro jiil leh aqoon, xirfad iyo qiyam sugan.

**1. Macallimiin Tababaran oo Yar**

Macallinku waa udub-dhexaadka habka waxbarashada, balse xogta jirta waxay muujinaysaa dhibaato weyn oo dhinaca tayada macallimiinta ah, keliya 40% macallimiinta ka shaqeeya dugsiyada hoose/dhexe iyo sare ayaa si rasmi ah u tababaran. Taas macnaheedu waa in ku dhawaad 60% macallimiinta aysan helin tababar macallinimo oo dhammaystiran. Arrintani waxay si toos ah u saameyneysaa tayada baridda (pedagogy), fahamka ardayga, iyo natiijooyinka waxbarasho ee guud.

Macallin aan tababarnayn ma awoodi karo inuu si wax ku ool ah u maareeyo fasalka, u qiimeeyo ardayda, ama u gudbiyo aqoon ku saleysan faham qoto dheer.

**2. Tayada Waxbarashada oo Hooseysa**

Mid ka mid ah caqabadaha ugu culus ee nidaamka waxbarashada Puntland waa tayada waxbarashada la bixiyo. Nidaamka hadda jira Ma soo saaro arday leh aqoon, akhlaaq, xirfad iyo mas'uuliyad bulsho oo isku dheelitiran, iyadoo 40% ardayda hesha waxbarasho aysan helin waxbarasho wax ka beddesha hab-fekerkooda ama xirfadahooda nololeed.

Tani waxay muujinaysaa in waxbarashadu ay noqotay mid ku kooban gudbinta macluumaad (theoretical knowledge), halkii ay ka ahaan lahayd dhisidda xirfado (skills), kobcinta qiyamka (values), iyo diyaargarowga nolosha dhabta ah.

**3. Manhaj Daciif ah**

Manhajka waxbarashadu waa hagaha ugu muhiimsan ee nidaamka waxbarasho, balse Puntland waxaa ka muuqda caqabado waaweyn oo ku saabsan fahamka manhajka iyo hirgelintiisa.

Waxaa jira isku dhex yaac u dhexeeya manhajka iyo diyaarinta buugaagta ardayda, iyadoo mararka qaar loo arko inay isku mid yihiin, halka ay dhab ahaantii kala duwan yihiin. Manhaj sax ah waa inuu si cad u qeexaa nooca waxbarashada la bixinayo, hababka qiimeynta ardayda, iyo heerarka laga filayo ardayga marka uu gaaro marxalad kasta.

Inkasta oo qaar ka mid ah qodobbadan ay ku qoran yihiin dukumentiyada manhajka ee jira, haddana badanaa waa dukumenti yaalla (theoretical documents) oo aan si dhab ah loo fulin. Tani waxay keentaa in nidaamka waxbarashadu noqdo mid aan lahayn jihayn cad iyo natiijooyin la cabbiri karo.

**4. Daciifnimada Maadooyinka STEM**

Maadooyinka Sayniska, Tiknooloojiyadda, Injineernimada iyo Xisaabta (STEM) waa aasaaska horumarka casriga ah, balse ardayda Puntland waxay aad ugu liitaan maadooyinkan.

Sababaha ugu waaweyn waxaa ka mid ah maalgelin la'aan, mudnaan la'aan siyaasadeed iyo qorsheyn, iyo agab waxbarasho oo xaddidan.

Sida ay muujinayaan imtixaannadii ugu dambeeyay ee shahaadiga ahaa heerka fahamka ardayda ee maadooyinkan waa mid hooseeya. Tani waxay halis gelinaysaa awoodda mustaqbalka ee dhalinyarada, iyo tartanka ay kula geli karaan suuqyada shaqo ee ku saleysan tiknooloojiyada iyo hal-abuurka.

## SOO-JEEDIN IYO XALAL WAARA

Iyadoo la tixraacayo caqabadaha jira ee waxbarashada Puntland, waxaa muhiim ah in la qaato xalal istiraatiiji ah oo aan ahayn kuwo ku-meel-gaar ah, balse dhisa nidaam waxbarasho oo waara, tayo leh, isla markaana la jaanqaadi kara baahiyaha suuqa shaqada iyo horumarka bulshada. Soo-jeedimahan waxay si toos ah uga jawaabayaan dhibaatooyinka ka jira helitaanka, tayada, iyo maamulka waxbarashada.

**1. Hirgelinta Nidaam ku salaysan karti iyo xirfad (Competence-Based Education)**

Mid ka mid ah isbeddellada ugu muhiimsan ee loo baahan yahay waa in waxbarashada laga wareejiyo nidaamka ku saleysan shahaadooyinka (certificate-based), loona gudbiyo nidaam ku saleysan karti iyo xirfad (competence-based education).

Tani waxay ka dhigan tahay in diiradda la saaro waxa ardaygu qaban karo, halkii laga eegi lahaa waxa uu xifdisanyahay. Qiimeynta ardayguna noqoto mid ku saleysan waxqabad dhab ah (performance-based assessment).

Tusaale ahaan: Arday ganacsi bartay waa inuu awood u yeeshaa diyaarinta business plan, sameynta business model, iyo fahamka suuqa iyo maareynta khatarta.

Habkan wuxuu si toos ah uga jawaabayaa baahida suuqa shaqada, isagoo soo saaraya arday si dhab ah u shaqeyn kara isla marka uu waxbarashada dhammeeyo.

**2. Kordhinta Miisaaniyadda Waxbarashada**

Maalgelinta waxbarashadu waa laf-dhabarta horumar kasta oo waara. Hadda miisaaniyadda waxbarashada Puntland waxay ku dhowdahay 7%, taas oo aan ku filnayn baahida jirta, isla markaana aan si hufan loo isticmaalin.

Haddaba, waxaa lama huraan ah in miisaaniyadda waxbarashada la kordhiyo ilaa 20% ugu yaraan, isla markaana la xaqiijiyo in si hufan, daahfuran, iyo natiijo ku saleysan loo maareeyo. Maalgelinta waxbarashadu waa maalgelin toos ah oo lagu dhisayo mustaqbalka dadka, iyo horumarka dhaqaalaha dalka.

**3. Xoojinta Kormeerka iyo Tayaynta (Monitoring & Regulation)**

Si loo hagaajiyo tayada waxbarashada, waa in la xoojiyo doorka dowladda ee kormeerka iyo nidaaminta waxbarashada.

Waxaa muhiim ah in la dejiyo shuruudo adag (standards) oo lagu qiimeeyo dugsiyada iyo jaamacadaha, si joogto ah loo sameeyo kormeer tayo (quality assurance), lana qaado

tallaabooyin adag oo ay ka mid yihiin xiritaanka ama dib-u-habaynta xarumaha aan buuxin heerarka tayada.

Haddii nidaamkan si dhab ah loo hirgeliyo, wuxuu si weyn u kordhin doonaa kalsoonida bulshada ee waxbarashada, iyo tayada wax soo saarka nidaamka waxbarasho.

**4. Ka Faa'iidaysiga Qurba-joogta (Diaspora Engagement)**

Qurba-joogta Soomaaliyeed waa hanti istiraatiiji ah oo si weyn uga qayb qaadan karta horumarinta waxbarashada Puntland.

## WAXAA JIRA LABA JIHO OO MUHIIM AH:

**a) Dhanka Aqoonta:**

- In la casuumo khubaro Soomaaliyeed oo dibadda ku nool si ay u bixiyaan tababbaro macallimiin iyo maamulayaal, ula wadaagaan khibradooda waxbarasho, iyo in la abuuro madallo aqooneed oo isku xira gudaha iyo dibadda.

**b) Dhanka Dhaqaalaha:**

- In la sameeyo ololeyaal ballaaran oo lagu taageerayo waxbarashada, lana dhiirrigeliyo diaspora-ha in ay maalgelin ku sameeyaan dugsiyada iyo jaamacadaha, kana qayb qaataan horumarinta kaabayaasha waxbarashada.

Isku xirka aqoonta iyo dhaqaalaha ee gudaha iyo dibadda wuxuu si weyn u dedejin karaa horumarka waxbarashada.

## GUNAANAD

Ugu dambeyntii, horumarinta waxbarashada Puntland iyo guud ahaan Soomaaliya waa hawl istiraatiiji ah oo u baahan aragti fog, hoggaan adag, iyo wada-shaqeyn ballaaran oo u dhexeysa dowladda, bulshada, iyo dhammaan daneeyayaasha waxbarashada. Inkastoo ay jiraan caqabado waaweyn oo isbiirsaday sida helitaan xaddidan, tayo waxbarasho oo hooseysa, macallimiin aan helin tababar ku filan, iyo nidaam maamul oo u baahan xoojinta kormeerka iyo tayaynta, haddana waxaa jira fursado waaweyn oo haddii si sax ah loo maareeyo horseedi kara isbeddel dhab ah.

Xogaha iyo falanqaynta kor ku xusan waxay si cad u muujinayaan in nidaamka waxbarashada uu weli u baahan yahay dib-u-habeyn qoto dheer, gaar ahaan dhinacyada tayada, manhajka, iyo wax-soo-saarka ardayda. Si kastaba ha ahaatee, fursadaha jira—gaar ahaan dhalinyarada badan, qurba-joogta firfircoon, iyo xiisaha sii kordhaya ee waxbarashada—ayaa ka weyn caqabadaha haddii si xeel dheer loo wajaho.

Sidaas darteed, isbeddel dhab ah wuxuu iman karaa marka la beddelo qaabka waxbarashada loona gudbo competency-based education, si dhab ah loo kordhiyo maalgelinta waxbarashada, la xoojiyo tayada, kormeerka, iyo nidaamka maamulka waxbarashada, lagana faa'iidaysto aqoonta iyo dhaqaalaha bulshada Soomaaliyeed ee gudaha iyo dibadda (diaspora).

Haddii tallaabooyinkan si dhab ah loo fuliyo, waxbarashadu waxay noqon kartaa aaladda ugu muhiimsan ee lagu dhiso jiil tayo leh, awood leh, isla markaana horseeda dib-u-dhiska iyo horumarka waara ee Puntland iyo guud ahaan Soomaaliya.

**Qore:** Muxsin Mowliid

# ISBAHAYSIGA FOWDADA IYO KELITALISNIMADA: SOOMAALIYA MAR LABAAD MA GELI KARTAA KELITALISNIMO IYADOO FOWDO KA CARARAYSA?



Sakariya Axmed Maxamed (Rabiic)



Xigashada Sawirka: AI Gen

Quruumo badan ayaa taariikhda ka bartay in kelitalisnimadu tahay xabsi weyn, balse qaar badan waxay goor dambe ogaadeen in fowdadu tahay qabri ka sii weyn. Bulshada Soomaaliyeedna waxay ka mid tahay ummadaha si qoto dheer u taabtay labadaas masiibo ee is quudiya: talis adag oo xorriyaddii cabburiyay, iyo fowdo burburisay dawladnimadii iyo wadajirka bulshada.

Muddo dheer ayay Soomaalidu ku hoos noolaayeen nidaam kelitalisnimo ah oo ku dhisnaa cabsi, amar iyo awood ku ururtay hal gacan. Dadku waxay u arkayeen in xorriyaddu tahay albaabka keliya ee lagu badbaadi karo. Markii kacdoonkii dhacayna, waxaa la mooday in albaabkii xorriyadda la furtay. Hase yeeshee, halkii laga geli lahaa nidaam iyo dawladnimo ku dhisan sharci iyo kala dambayn, waxaa lagu dhacay godkii fowdada iyo dagaallada sokeeye. Dawladdii waa ay burburtay, bulshaduna waxay dib ugu noqotay qabaa'il iyo kala qoqobnaan, waxaana run noqday oraahdii Ibn Khaldun ee ahayd: "Fowdadu waxay halaag u tahay bini-aadamka, waxayna kharribtaa ilbaxnimada."

Qormada mufakirka weyn ee Shiikh Maxamed Al-Mukhtaar Ash-Shanqiidi uu kaga hadlayo "Isbahaysiga Fowdada iyo Kelitalisnimada" waxay si yaab leh ugu muuqataa muraayad ka tarjumaysa waayaha Soomaalida. Wuxuu tilmaamayaa in labadaas cudur — kelitalisnimada iyo fowdadu — aysan is diidin, balse ay yihiin laba walaalo ah oo mid walba kan kale dhalo. Kelitalisnimadu waxay dhalisaa caro iyo qarax bulsho; fowdaduna waxay dadka ku riixdaa inay dib ugu noqdaan raadin "gacan adag" oo xukunta.

Cabdullaahi ibn Cabbaas (RC) wuxuu fasiray aayadda:

قُلْ هُوَ الْقَادِرُ عَلَى أَنْ يَبْعَثَ عَلَيْكُمْ عَذَابًا مِنْ فَوْقِكُمْ أَوْ مِنْ تَحْتِ أَرْجُلِكُمْ

in "cadaabta korka ka timaadda" ay yihiin madax daalimiin ah, halka "cadaabta lugaha hoostooda ka timaaddaa" ay yihiin fowdada iyo dad aan kala garanayn wanaagga iyo xumaanta. Waa fasiraad si qoto dheer u taabanaysa xaaladaha siyaasadeed ee ummadaha. Ummaddu mararka qaar waxay ku halaagsantaa hoggaan dulmi wada, mararka qaarna waxay ku halaagsantaa kala dambayn la'aan.

Soomaaliya maanta waxay mar kale taagan tahay isgoys taariikhi ah. Waxaa muuqata cabsi ah in taladii dastuuriga ahayd ay leexatay, kaddib markii muddo xileedkii madaxda sare dhammaaday haddana wax ka beddel lagu sameeyay dastuurka si muddo kororsi loo helo. Arrintaasi waxay abuurtay mucaaradad xooggan iyo kala shakiga siyaasadeed ee sii kordhaya. Dad badan waxay dib u xusuusanayaan casharradii qaraaraa ee ay taariikhdu ka tagtay: marka sharciyadda la dhaawaco, kalsoonida bulshada way duntaa; marka kalsoonidunа dunto, qaranku wuxuu u sii dhaqaaqaa khilaaf iyo jahawareer.

Laakiin khatarta ugu weyn ma aha oo keliya muddo kororsiga ama muranka siyaasadeed ee maanta jira; khatartu waxay tahay in bulshada lagu riixo laba daran mid dooro: inay aqbasho kelitalisnimo cusub si looga baqo fowdo, ama inay ku dhacdo fowdo ay ka dhalato kelitalisnimo kale. Taariikhdu waxay ina bartay in labaduba yihiin waddooyin halaag leh.

Jean-Jacques Rousseau wuxuu yiri: "In qofku xorriyaddiisa ka tanaasulo waxay la mid tahay inuu bini-aadantinimadiisa ka tanaasulay." Halka James Madison uu yiri: "Waa in marka hore xukuumadda la siiyo awood ay ku xakamayso dadka la xukumo, dabadeedna lagu khasbo inay iyadu nafteeda xakamayso." Labadan oraah waxay soo koobayaan sirta dawladnimo kasta oo waarta: xorriyad aan nidaam lahayn waxay isu beddeshaa fowdo, nidaam aan xorriyad lahayna wuxuu isu beddelaa kelitalisnimo.

Soomaalidu waxay muddo dheer ku dhibtooday helidda isu dheellitirkaas. Markii la dumiyay nidaamkii militariga ahaa, lama helin hay'ado adag oo ilaalin kara sharciyadda iyo kala dambaynta. Qabiil, hub iyo dano gaar ah ayaa buuxiyay booskii dawladnimada. Waxaa markaas dhab noqotay digniintii Al-Kawakibi ee ahayd: "Haddii arrintu fowdo isu beddesho waxaa kharribma midnimada diimeed, waxaana furma xiriirka siyaasadeed."

Waxa maanta looga baahanyahay Soomaalida ma aha inay dib ugu laabtaan kelitalisnimo lagu marmarsiyoonayo amni, mana aha inay ku dhacaan fowdo lagu magacaabo xorriyad. Waxa loo baahanyahay waa dawladnimo ku dhisan sharci, heshiis bulsho iyo kala dambayn ay dadka iyo madaxdu si siman ugu wada xiran yihiin. Dastuurku waa inuu noqdaa heshiiska ugu sarreeya ee aan lagu ciyaarin marka dano siyaasadeed yimaadaan. Haddii madaxdu jebiso xeerkii ay dadka ugu talinaysay, waxay dhaawacaysaa aasaaska dawladnimada lafteeda.

Taariikhda Kacdoonkii Faransiiska ayaa iyaduna tusaale cad bixisay. Dadkii kacdoonka sameeyay waxay ka carareen boqortooyo adag, balse markii ay ku dhaceen fowdo iyo dhiig badan, waxay ugu dambayn taladii gacanta u geliyeen Napoleon Bonaparte. Sidaas ayay xorriyaddii ugu dambayn ugu noqotay kelitalisnimo cusub. Albert Soboul wuxuu soo xigtay hoggaamiye Faransiis ah oo yiri: "Waxaan si degdeg ah uga guurnay addoonnimadii una guurnay xorriyad, laakiin waxaan si ka sii degdeg badan uga sii guureynaa xorriyaddii una guureynaa addoonnimo."

Casharka ku jira waayahaas iyo kuwa Soomaaliyaba waa mid cad: fowdadu mar walba waxay waddo u keentaa kelitalisnimo cusub, kelitalisnimaduna waxay uurka ku siddaa fowdo soo socota. Ummadaha badbaadaa waa kuwa awooda inay dhexda ka helaan xorriyad iyo nidaam, sharci iyo xukun, dawladnimo iyo xuquuq.

Soomaaliya maanta waxay u baahantahay in ay ka barato taariikhdeeda ka hor inta aysan taariikhdu mar kale isku celin.

**W/Q:** Sakariye Xaaji Axmed Iley " Rabiica"



# XAAJI FAARAX OOMAAR ILEEYE (1879–1949): WADDANI ADAG IYO QAREENKII UGU HORREEYAY EE SOOMAALIYEED



Dr. Cabdiraxmaan Baadiyow



Xigashada Sawirka: Wikipedia

Xaaji Faarax Oomaar Ileeye (1879–1949) wuxuu ahaa waddani Soomaaliyeed oo u heellan qarannimada Soomaaliyeed isla markaana hormuud ka ahaa bulshada rayidka Soomaaliyeed. Waxa uu ku dhashay deegaanka Hagal ee gobolka Saaxil ee Somaliland, isaga oo ka soo jeeday qoys xoolo-dhaqato hodan ah oo xiriir la lahaa dariiqada Suufiyada ee Qaadiriya. Waxbarashadiisu waxay ka bilaabatay dugsi Qur'aan oo ku yaallay deegaankiisa, kaddibna sanadkii 1886 ayuu u wareegay magaalada Berbera si uu u sii wato waxbarashadiisa. Magaalada Berbera, Xaaji Faarax wuxuu ka mid ahaa 11-kii arday ee ugu horreeyay ee lagu qoro Dugsiga Mission-ka Kaatooliga Faransiiska oo isla sannadkaas laga furay magaalada. Markii uu dhammeystay waxbarashadiisii hoose sanadkii 1891, isaga iyo ardaydii ay isku fasalka ahaayeen waxaa loo wareejiyay magaalada Cadan, halkaas oo ay ku dhigteen Dugsiga Kaniisadda Mary si ay uga sii wataan waxbarashada dhexe iyo tan sare, iyadoo qaar ka mid ah ardaydaasi ay qaateen diinta Masiixiga, sida aabbaha Michel Mariano.

Sanadkii 1904, Xaaji Faarax wuxuu dib ugu soo laabtay dalkiisa kadib markii uu dhammeystay waxbarashadiisa isaga oo jira 25 sano. Wuxuu ku biiray adeegga gumeysiga isagoo sarkaal ka noqday ciidamada Camel Corps oo ka tirsanaa ciidanka Ingiriiska. Intii uu halkaas ka shaqeynayay, wuxuu si dhow ula kulmay xaqiiqooyinka adag ee maamulka gumeysiga Ingiriiska iyo sida ay ula dhaqmayeen shacabka Soomaaliyeed. Dareenka xooggan ee uu u qabay caddaaladda iyo sinnaanta ayaa si cad u muuqday markii maamule Ingiriis ahi weydiiyay mushaharka iyo hoyga askari madow la siinayo, isagoo ku jawaabay, "Waa inuu la mid noqdaa kan askari caddaan ah." Mawqifkiisa adag ee ku saabsan sinnaanta jinsiyadeed wuxuu khilaaf kala dhex dhigay madaxdiisii, taasoo sababtay in shaqada laga hakiyo isla markaana si dhow loola socdo. Mudadii uu ka tirsanaa Camel Corps, Xaaji Faarax wuxuu la kulmay caqabado badan, oo ay ka mid ahaayeen eedeymo sheegaya inuu xiriir la lahaa dhaqdhaqaaqii Daraawiishta oo Ingiriisku u arkayay cadow. Ugu dambeyntii, sanadkii 1911, iyadoo xiisadaha iyo shakigu sii kordheen, waxaa laga eryay ciidamada Camel Corps.

Waxqabadkii Xaaji Faarax Oomaar Ileeye ee bulshada rayidka Soomaaliyeed iyo sida hagar la'aanta ah ee uu ugu heellanaa daryeelka iyo horumarka shacabka Soomaaliyeed waxay reebeen dhaxal taariikhi ah. Noloshiisa iyo ficilladiisaba weli waxaa loo xusuustaa inay markhaati u yihiin sida ay uga go'nayd caddaaladda iyo sinnaanta dhammaan Soomaalida. Isaga oo sii waday dadaalladiisii ku aaddanaa wacyigelinta bulshada iyo la dagaallanka dulmiga gumeysiga, Xaaji Faarax wuxuu la kulmay caqabado waaweyn oo kaga yimid maamulka gumeysiga, kuwaas oo si naceyb leh u eegayay dhaqdhaqaaqiisa. Si kastaba ha ahaatee, wuxuu helay deeq waxbarasho oo uu ku aaday Jaamacadda Muslimiinta ee Aligarh ee dalka Hindiya, halkaas oo uu ku bartay cilmiga sharciga.

Intii uu joogay jaamacadda, Xaaji Faarax wuxuu helay aqoon iyo waayo-aragnimo ballaaran. Wuxuu xiriir la yeeshay macallimiin iyo arday ku lug lahaa dhaqdhaqaaqyadii ka dhanka ahaa gumeysiga ee Afrika iyo Aasiya. Sidoo kale wuxuu si dhow ula socday halgankii xorriyadda Hindiya ee ay hoggaaminayeen haldoorka caanka ah sida Mahatma Gandhi, Jawaharlal Nehru, iyo Muhammad Ali Jinnah. La kulankiisii Gandhi wuxuu baray muhiimadda iska caabbinta aan rabshadaha lahayn, taas oo saameyn weyn ku yeelatay habkii uu u wajahayay halgankiisa. Xaaji Faarax waxa kale oo dhiirrigeliyay fikirrada iyo dadaallada halgamayaal Islaami ah iyo waddaniyiin ka soo jeeday dunida Muslimka, sida Jamal al-Din al-Afghani, Shakib Arslan, iyo Saad Zaghloul. Khibradahani waxay sii xoojiyeen aragtidiisa iyo sida ay uga go'nayd la dagaallanka caddaalad-darrada iyo hirgelinta sinnaanta.

Markii uu ka qalin jabiyay shahaadada sharciga—isagoo noqday qofkii ugu horreeyay ee Soomaali ah ee heerkaas gaara—Xaaji Faarax wuxuu ku laabtay Somaliland, wuxuuna ku biiray Ururka Qareennada Ingiriiska. Wuxuu Hargeisa ka aas-aasay xafiiskii ugu horreeyay ee qareennimo ee Maxmiyadda Ingiriiska ee Soomaaliya, si uu u difaaco xuquuqda dadkiisa ee ka dhanka ahayd cadaalad-darrada iyo tacaddiyada gumeysiga. Inkasta oo uu lahaa go'aan adag, haddana wuxuu la kulmay cadaadis joogto ah oo kaga imaanayay maamulka gumeysiga. Sanadkii 1925, isagoo aan u adkeysan karin dhibaataynta iyo cabsi gelinta sii kordhaysa, wuxuu u wareegay Cadan, halkaas oo uu ka sii watay halgankiisa. Cadan gudaheeda wuxuu si wadajir ah ula aas-aasay asxaabtiisa Ururka Islaamiga ah ee Soomaalida, oo noqday ururkii ugu horreeyay ee bulshada rayidka Soomaaliyeed, ujeeddadiisuna ahayd difaaca xuquuqda shacabka Soomaaliyeed iyo horumarintooda, taasoo tusaale u noqotay ururradii bulshada rayidka ee ka dambeeyay gobolka. Dadaalkiisa iyo adkaysigiisa ayaa ka

dhigay shakhsi muhiim ah oo hormuud ka ah halganka madax-bannaanida iyo caddaaladda bulshada Soomaaliyeed. Socdaalkii Xaaji Faarax ee Cadan ilaa London wuxuu astaan u ahaa marxalad cusub oo halgankiisa ah; markuu London gaaray, si diirran ayaa loogu soo dhaweeyay Ururka Qareennada Ingiriiska, wuxuuna si degdeg ah ugu dhex milmay hawlaha u doodista. Wuxuu abaabulay kulamo, wuxuuna jeediyay khudbado saameyn leh oo lagu qabtay magaalooyin kala duwan oo Britain ah, sidoo kalena wuxuu qoray maqaallo lagu daabacay wargeysyo, kuwaas oo si adag u dhaliilayay sida ay dowladda Ingiriisku ula dhaqanto shacabka Soomaaliyeed ee Maxmiyadda Ingiriiska.

Intii uu ku sugnaa Britain, Farah wuxuu la xiriiray Soomaali badan, wuxuuna Ismaail Telefon u magacaabay wakiilkiisa si uu u sii wado hawshiisa intii uu maqnaa. Kahor inta uusan dib ugu laaban dalkiisa, wuxuu soo gutay xajkii uu ku aaday Maka. Wuxuu sii maray Cadan, halkaas oo loo doortay Madaxweynaha Ururka Islaamiga ah ee Soomaalida, taasoo sii xoojisay hoggaamintiisa qurba-joogta Soomaaliyeed. Sanadkii 1938, Faarax wuxuu dib ugu soo laabtay dalkiisa, waxaana aqoonsaday culimada Islaamka iyo odayaasha beesha Isaaq ee Somaliland iyo Kenya inuu noqdo afhayeenkooda rasmiga ah. Doorkaas cusub ee uu helay ayuu ku qabtay shirar iyo kulammo, isagoo dadkiisa barayay kororka dhaqdhaqaaqyada xoreynta ee dunida ka socda, isla markaana ku boorinayay kacaan ka dhan ah gumeysiga Ingiriiska ee Soomaaliya. Khudbadihiisa aftahannimada leh ee ku saleysan khibradihiisa safar iyo halgan ayaa soo jiitay hoggaamiyeyaal muhiim ah oo ay ka mid yihiin culimo diimeed, odayaal dhaqameed, iyo saraakiil kale oo bulshada ka mid ah.

Maamulka Ingiriiska, oo ka welwelsanaa kicinta joogtada ah ee Faarax iyo saamaynta sii kordhaysa ee uu bulshada ku dhex lahaa, waxay qaadeen tallaabooyin adag. Waxay u masaafuriyeen jasiiradda Socotra, halkaas oo lagu xiray ilaa sanadkii 1945. Markii la sii daayay, Faarax wuxuu ku laabtay dalkiisa, balse wuxuu la kulmay xaalad caafimaad oo liidata, waxaana markale loo diray masaafuris, markan magaalada taariikhiga ah ee Islaamiga ah ee Harar ee Itoobiya. Kadib lix bilood oo uu ku sugnaa Harar, caafimaadkiisa oo sii xumaaday ayaa ku qasbay inuu dib ugu soo laabto Hargeysa, halkaas oo uu sii watay halgankiisa ilaa uu ku geeriyooday sanadkii 1948 isagoo 70 jir ah. Inkasta oo uu la kulmay masaafurino badan, xarig, iyo caqabado caafimaad, haddana adkaysigiisa aan gabbashada lahayn ee ka dhanka ahaa gumeysiga wuxuu reebay raad joogto ah oo taariikhda Soomaaliyeed ku xardhan. Waxaa lagu xusuustaa inuu ahaa qareenkii ugu horreeyay ee Soomaaliyeed, halgamaa bulshada rayidka ah, iyo waddani adag oo si hagar la'aan ah ugu adkaystay raadinta caddaalad iyo xorriyad. Erayadiisii ugu dambeeyay kahor geeridiisa waxay ahaayeen kuwo xoogga saaraya midnimada, isagoo yiri: "Dalkaygu aad buu u yar yahay si aan dadkiisa loo kala qaybin karin." Farriintan sagootinta ah waxay weli u taagantahay dhaxal qoto dheer oo ka tarjumaya doorkiisii hormuudnimo ee midnimada iyo xorriyadda Soomaaliya.

Ka sheekaynta sheekada aan si buuxda loo faafin ee Xaaji Faarax Oomaar Ileeye waa mid muhiim ah, gaar ahaan xilli ay Soomaalidu wajahdo kala qaybsanaan, maadaama ay bixiso aragtiyo qiimo leh oo ku saabsan adkaysigii iyo go'aan qaadashadii jiilashii hore ee halganka u galay xorriyad iyo midnimo. In la iftiimiyo nolosha iyo dhaxalka shakhsi muhiim ah sidaas oo kale waxay jiilka maanta siinaysaa faham qoto dheer oo ku saabsan hidahooda iyo caqabadihii ay soo mareen awoowayaashood. Nolosha Xaaji Faarax waxaa astaan u ahaa halgan aan joogsi lahayn oo ka dhan ah gumeysiga, iyo u heellanaanta xuquuqda iyo daryeelka shacabka Soomaaliyeed. Marka la qoro taariikh nololeedkiisa, waxaan xushmaynaynaa xusuusta halyey noloshiisu ahayd mid ku dhisan adkaysi, geesinimo, iyo raadinta caddaalad aan gabbasho lahayn. Sheekadiisu waxay jiilka maanta u tahay cashar dhiirrigelin ah oo ku boorinaya inay qiimeeyaan allabaryadii ay bixiyeen jiilashii hore, isla markaana ay sii wadaan dadaalka lagu gaarayo mustaqbal xorriyad iyo midnimo u ah dhammaan shacabka Soomaaliyeed.

GORFEYN

# SIYAASADDA DABOOLIDDA QARASHAADKA ADEEGGA CAAFIMAADKA PUNTLAND



Cabdinur C. Soofe



**Xigashada Sawirka**: Facebook

# HORDHAC

Siyaasaddan cusub ee daboolidda qarashaadka adeegyada caafimaadka oo dhawaan golaha wasiirada Puntland ay ansixiyeen waxay ku soo aadday iyadoo ay hoos u dhacday taageeradii deeq-bixiyeyaasha iyo wada shaqayntii dowladda dhexe labaduba sida ku xusan qodobbada siyaasadda ee 8.2, 8.3, Iyo Meela Kale (IMK), siyaasadda waxaa loogu talaggalay xoojinta adeegga caafimaadka taasoo himila ahaan wanaagsan.

Siyaasaddu waxay dul istaagaysaa dhibaatada taagan, iyo baahida loo qabo nidaam dhaqaale oo gudaha ka yimaada (Qod, 1.2, qod, 2.2, Imk). Waxaa kaloo lagu sheegay in laga duulayo qorshaha horumarinta Soomaaliya, tubta, habraacyada caafimaadka iyo himilooyinka caalamiga ah sida caafimaad dadka wada gaara (Universal Health Coverage) iyo hiigsiyada horumarin waarta (SDGs) (qodobka 1.4).

Siyaasaddu waxay diiradda saaraysaa in xarumaha caafimaadku dib u soo ceshadaan qayb ka mid ah kharashaadka adeegyada iyagoo adeegsanaya waxa afka qalaad loo yaqaan user fees (Khidmad yar oo dib laga go'aamin doono tiradeed) iyadoo la ilaalinayo dadka nugul oo loo marayo ka-dhaafis (Qod, 1.2 & IMK). Meelaha qaar siyaasaddu waxay tilmaamaysaa in adeegyada aasaasiga ah sida tallaalka umulinta, daryeelka dhalmada, qorsheynta qoyska iwm, sii ahaanayaan bilaash (Meelahaan waa inta deeqbixiyayaashu taageeraan), halka adeegyada heerka labaad (Secondary health) iyo saddexaad ( Tertiary) lagu soo rogi doono khidmad la sharciyeeyey (Qod, 5.2 & IMK), balse marka lala aqriyo qodobka 1.3, xilliga ay kusoo aaddey, war saxaafadeedka wasaaradda iyo adeegyadii ka bixi jiray xarumaha Bari ee la tibaaxey, waxay u muuqataa in lagu dabaqi doono heerarka oo dhan.

Si guud, inkastoo xal uraadinta qarashaadka caafimaadka iyo jaangoynta khidmadaha xarumuhu muhiim yihiin; haddana marka si dhug leh loo eego, waxaa ka muuqda siyaasadda goldaloolooyin waaweyn oo saameyn kara u sinnaanta caafimaadka, caddaaladda iyo hirgalintinta siyaasaddaba.

# GOLDALOOLOOYINKA KA MUUQDA SIYAASADDA

1. Iska-hor-imaad: Siyaasaddu waxay isku dayaysaa in ay isku larto laba aragtiyood oo si dabiici ah isku khilaafsan oo kala ah: helitaan caafimaad aan culays dhaqaale lahayn (Universal health coverage) iyo kordhinta lacagaha tooska ah ee bukaanku bixiyo. Daraasado badan ayaa muujinaya in khidmadda bukaanku bixiyo (user fees) si toos ah u yareeyo doonashada adeegyada caafimaadka, gaar ahaan dadka saboolka ah (Dehnavi et.al, 2025, Ahmed, et.al 2023, Khalif, et.al 2026). Sidaa darteed, lacagaynta adeegu wuxuu horseedi karaa in dadka saboolka ah ay imaan waayaan, kuwa dhaqaalaha haystana isbitaallada gaarka loo leyahay aadaan.

2. Iskutiirin xad dhaafa ee khidmada bukaanku bixiyo: Siyaasaddu waxay u aragtaa khidmadda bukaanka xal dhaqaale oo lagu maarmi karo, balse tani suuragal ma ahan, khidmaddaan waxaa loo sameeyaa caadiyaan in ku noqnoqashada adeegga iyo ka faa'iidaysiga xad-dhaafkaa lagu yareeyo ee maaha il dhaqaale oo qarash weyn lagu baxsho. Hadday dhacdo in lagu tiirsanaado khidmadda bukaanka (User fee), qarashka bukaanku baxsho kuma fillaan doono adeegyada caafimaadka haddii ay ka jabnaadaan isbitaallada kale, waxay kaloo noqon kartaa culays dhaqaale oo shacabku dareemo haddii la qaaliyeeyo. Dhanka kale, waxaa muuqata inaan xisaabta lagu darin canshuurtii dadweynaha ee kabi lahayd caafimaadka.

3. Ka dhaafid aan caddeyn: Siyaasaddu waxay tilmaameysaa ka-dhaafisyo si loo ilaaliyo dadka saboolka ah, balse lama qeexin hab cad oo lagu kala saarayo qofka saboolkaa iyo kaan ahayn. Arrintani waxay keeni kartaa in dadkii u baahnaa lacag laga qaado, halka kuwa aan u baahnayn ay ka faa'iidaystaan, qarashaadkana laga dhigto la jiifiyaana banaan.

4. Goldaloollo la xariirta xaq-soorka xarumaha dagmooyinka yaryar iyo kuwa magaalooyinka waaweyn: Inkastoo siyaasaddu aqoonsantahay kala duwanaanshaha magaalooyinka waaweyn iyo magaalooyinka yaryar, ma bixinayso habraac loogu caddaalad falo; madaama

xarumaha ku yaalla magaalooyinka waaweyn ay heli karaan dakhli aysan heli karin kuwa magaalooyinka yaryar.

5. Goldaloolooyin dhanka hirgalinta la xariira: Siyaasaddu waxay u badantahay tilmaama guud, kumana cadda khidmadaha, habraaca khidmadaha iyo habraaca hirgalinta toona; taasoo keeni karta fasiraaado kala duwan.
6. Iino dhanka Maamul wanaagga la xariira: Inkastoo la tilmaamey hufnaan, haddana siyaasaddu tilmaami mayso waddadii iyo qaab-dhismeedkii lagu hirgalin lahaa, kuma cadda habraac, cabasho bukaan iyo dabagal toona.
7. Caddayn iyo xog yaraan: Siyaasaddu kuma salaysna cilmi-baaris ku filan oo deegaanka ku saabsan, sida saameynta khidmadahu ku yeeshaan tagista isbitaallada iyo qiyaasta dakhliga laga filan karo inuu soo xaroodo.
8. Ismoodsiis (assumption): Siyaasaddu waxay mala awaaleysaa inay dadku lacagta bixin doonaan haddii adeeggu hagaago; balse taas si ka duwan dadka saboolka ah qiimaha iyo awoodda dhaqaalaa uga muhiimsan tayada adeegga.
9. Maqnaanshaha habab kale oo caafimaadka loo kabo sida caymis bulsho, caymis shaqa-bixiye, canshuurta badeecadaha xun, miisaaniyad dowladeed iwm.
10. Arrimaha kale ee maqan waxaa kamid ah siyaasaddu ma caddayn, mana reebin cidda qarashka qaadaysaa inay noqon karto dowladda keliya si aan loo siyaasadeyn nadaamka caafimaadka.
11. Arrinta halista leh ee ugu danbeysa, siyaasaddu waxay ogolaanaysaa in caafimaadka lagu wareejin karo shirkadaha gaarka loo leeyahay (PPP) oo hadda bulshadu ku dhibban tahay. Waxaana ka dhalan karta in si qaldan looga faaideysto hantida dadweynaha iyo taageerada deeq-bixiyayaasha.

Caadiyan waa dhacdaa in adeegyada qaar isbitaalla gaar loo leeyahay loo dhiibo ama loo wakiisho dhismaha iwm; balse ma dhacdo dunida in isbitaallada dowladeed lagu wareejiyo gabi ahaan.

## GUNAANAD

Guud ahaan, in siyaasad laga dajiyo qarashaadka xarumaha caafimaadka ee dowliga waa arrin wanaagsan, balse waxa ka muuqda cillada saameyn kara helidda adeeg caafimaad oo loo simanyahay. Ku-tiirinta adeegga caafimaadka keliya khidmad iyo baaqiga deeqaha, waa halis kale waliba dadka saboolka ah oo bulshada inta ugu badan ah. Haddii aan laga digtoonaan, waxaa jirta halis ah in siyaasaddan kordhiso culayska dhaqaale ee bukaanka la saaro, dhaliso sinaan la'aan caafimaad, yarayso helitaanka adeegyada caafimaadka, sidoo kalana hoos u dhigto kalsoonida bulshada, isweydiinna geliso waxa dowladdu ku toorran tahay madaama adeegyadii oo dhan lacag laga dhigay.

**Intaan la hirgalin siyaasaddaan waxaan ku talinayaa**

1. In la ballaariyo la tashiyada si loo helo aragti dheellitiran.
2. In laga fakaro habab kale oo loo kabi karo caafimaadka sida kordhinta miisaaniyadda caafimaadka
3. In canshuur gaar ah caafimaadka loo saaro badeecadda halista caafimaad leh (Sin tax); sida Qaadka, Sigaarka, Tubaakada iyo dawooyinka laysku caddeeyo.
4. In la hirgaliyo caymiska bulshada iyadoo khidmad yar laga qaadayo qoysaska si ay u helaan caafimaad lacag la'aan ah.
5. Wasaaraddu waxay ku soo dhaqmaysay siyaasadda ballaarinta xarumaha, taa baddalkeeda waxaa haboon in la yareeyo xarumaha balse la tayeeyo adeegga meela kooban, awooddana la saaro baabuurta gargaarka degdegga ah, iyadoo meelaha aan dadka badan joogin lagu soo koobayo gargaarka degdega iyo ambulance-ta.

6. In shirkadaha ganacsiga iyo xarumaha kale ee loo shaqeeyo lagu qasbo inay caymis caafimaad galiyaan shaqaalahooda.
7. In qaaraan yar loo saaro caafimaadka is-waydaarsiga lacagaha danabaysan sida 0.01 ama ila 0.05 boqolkiiba.
8. Inaan loo arag khidmadda bukaanka xal buuxa, iyo in la caddeeyo shuruudaha qofka loogu tixgalinayo sabool, lana sameeyo xafiis dabagal iyo cabasho oo isha ku haya sida loola dhaqmayo bukaannada qarash ahaan iyo daaweyn ahaanba.

Ugu danbeyntii, waa u mahadcelinayaa dhamaan dadkii ka soo shaqeeyey siyaasadda, waxaana muhiim ah in laysu dheellitiro dawga muwaadinku u leeyahay inuu helo adeeg caafimaad oo aan culays ku ahayn iyo socodsiinta hawlaha caafimaadka.

## RAADRAAC


1. Ministry of Health Puntland State of Somalia. (2025). Cost recovery policy for equitable and sustainable healthcare services in Puntland. Unpublished doc.
2. Dehnavi, H., Nematollahi, M.S., Daneshkohan, A. et al. From fees to free: impacts of user fee removal on child health outcomes – a systematic review. Int J Equity Health 25, 12 (2026). https://doi.org/10.1186/s12939-025-02730-w
3. Hodan, A., et al. (2023). Constraints to maternal healthcare access among pastoral communities in the Darussalam area of Mudug region, Somalia: A qualitative study. Frontiers in Public Health, 11. https://doi.org/10.3389/fpubh.2023.1210401
4. Khalif. M., Warei, S. Y., & Abubakr, A. H. A. (2026). Burden or benefit? Unveiling the impact of out-of-pocket health expenditures in Somalia's healthcare system. Health Economics Review, 16(5). https://doi.org/10.1186/s13561-025-00703-




# TAXANAHA "DIIN IYO DAWLAD"
## QEYBTA 1AAD



Dr. Maxamed Cali Faarax



Xigashada Sawirka: Alharam

Waxaa muddooyinkan dambe soo ifbaxay qoraallo iyo doodo ka soo maaxanaya caqliga aqoonyahanno Soomaaliyeed; kuwaasoo si toos ah oo aan gabasho lahayn u inkiraya in diintu ay siyaasadda iyo dawladda wax xiriir la leedahay, ayna ku kooban tahay xiriirka u dhexeeya qofka Muslimka ah iyo Allaha abuuray, waana Madhabka Calmaaniyadda oo kala saaraya diinta iyo dawladda, isagoo nolosha ka fogaynaya waxkasta oo diin u nasab sheegta, kuna koobaya masaajidka, cibaadada iyo xiriirka u dhexeeya qofka iyo Allaha abuuray.

Kala soocidda diinta iyo dawladda waxaa ku kadsoomay amaba ku qancay dhallinyaro wax bartay oo aan tiro yarayn, waxaadna arkaysaa iyagoo oranaya maxaa diinta ka galay siyaasadda iyo dawladnimada, wadaadkase maxaa siyaasad u geeyey, muu masaajidkiisa iska joogo, waxaas oo dhami waa fikrado iyo falsafado laga soo minguuriyay Reer Galbeedka, dadka Muslimiinta ah qaar ka mid ahina ay ku sirmeen, una maleeyeen fikrado sax ah oo meel loola noqdo leh.

Haddaba; anigoo dareensan saamaynta arrintani ku dhex leedahay dhallinayarada, iyo baahida loo qabo in laga jawaabo qoraallada, doodaha iyo fikradaha khaldan oo bulshada Muslimka ah lagu dhex faafinayo; si loo abuuro shaki iyo shubhooyin calmaaniyadda salka ku haya, diinteennana ku suntaya inaysan nolosha iyo maaraynteeda wax shaqo ah ku lahayn, ayaan waxaan jeclaystay inaan bilaabo taxane aan ugu magac-daray: "Diin iyo Dawlad" oo ah maqaallo dhowr ah oo aan ku sharraxayo "Calmaaniyadda", waxay tahay, siday ku bilaabatay, iyo sababaha keenay; anigoo caddaynaya xiriirka ka dhexeeya diinta iyo dawladnimada amaba Islaamka iyo Siyaasadda.

***Calmaaniyadda: bilowgeedii, siday u kobocday iyo saamaynta ay ku leedahay nolosha Islaamka ee casriga ah***

## HORDHAC

Ummad marka burbur ku dhaco, waxaa haleela cudur ah inay "Haybteeda" garan wayso, waxayna la amankaagtaa ama la ashqaraartaa xadaaradda isticmaarka iyo gumaystaha: horumarkooda, nidaamyadooda iyo qiyamkooda.

Waxay arrintaani ku dhacday ummadda Muslimka ah markii ay diintii Alle u soo dejiyey dayacday, Reer Galbeedka dhal-dhalaalkoodana wax moodday, waana sida Nebigu SCW uu noo sheegay isagoo yiri:

**"لتركبنَّ سنن من كان قبلكم شبراً بشبر ودراعاً بذراع حتى لو دخلوا جحر ضب لدخلتم، وحتى لو أن أحدهم جامع امرأته بالطريق لفعلتموه". رواه مالك بسند صحيح، واصله عند مسلم.**

"Waxaad raaci doontaan dariiqii kuwiii idinka horreeyey (Yahuud iyo Nasaaro), xattaa haddii ay galaan god Masolugalay waad ka daba galaysaan, haddii midkood haweenaydiisa ku jimaaco dariiqa waad ka daba samaynaysaan".

Si kastaba ha ahaatee; Muslimiintu markii duullaan maskaxeedka (الغزو الفكري) lagu soo qaaday, waxaa loo soo raray (waariday) afkaaro iyo madaahib aan dhulka Muslimiinta ka jirin, balse loogu ekeysiiyey inay xadaaradda iyo horumarka saldhig u tahay, waxaana ka mid ah Calmaaniyadda oo ah mad-hab ama fikrad nooga timid dhinaca Reer Galbeedka gaar ahaan gumaystayaashii reer Yurub, laguna laro inta badan kalmadda "dimuqraadiyadda" iyo hal-kudhegyo aysan dadku aad dareen uga muujin sida: "diinta iyo siyaasaddu isma dhex-galaan" iyadoo siyaasadda dadka loogu tusayo khiyaano iyo hagardaamo, diinkuse uu yahay muqaddas daahir ah.

Waxaa muddooyinkan dambe soo if-baxay aqoonyahanno bulshada Soomaaliyeed ugu yeeraya nidaamka calmaaniyadda oo ah in diinta laga fogeeyo nolosha oo dhan (siyaasad, maamul iyo qaybaha kale ee dhaqan-dhaqaale), laguna koobo masaajidka iyo xiriirka u dhexeeya qofka iyo Allaha abuuray. Waa mad-hab dagaal adag kula jira in diintu wax saamayn ah ku yeelato siyaasadda, xadaaradda iyo hab-dhaqanka nolosha dadka, lagana soo minguuriyey xaddaaradda Masiixiga ee Reer Galbeedka, oo iyadu markii ay duullaanka ku qaadday wadaadkii Kaniisadda joogay oo xukunka maroorsaday, ka fogaatay diin iyo wixii u nasab sheegtaba.

Aqoonyahannadani waxay qoreen buugaag ay ku suuqgaynayaan mad-habka calmaamiyadda, waxay qabteen doodo kala duwan oo ay bulshada ku wacyigelinayaan iyagoo ku tirtirsiinaya in diintu ay masjidka ku egtahay, noloshana aysan shaqo ku lahayn, tusaale ahaan waxay daliil ahaan u soo qaateen hadal uu yiri Mahatma Gandh (1869-1948) oo u qornaa sidan: "Haddii aan kelitaliye ahaan lahaa, diinta iyo dawladdu way kala soocnaan lahaayeen. Diintayda waan ku dhaaranayaa, waana u dhimanayaa. Laakiin waa hawl aniga ii gaar ah. Dawladdu shuqul kuma laha diinta. Dawladdu waxay

daryeelaysaa baraaraha adduunyada, caafimaadka, isgaarsiinta, arrimaha dibadda, lacagaha iyo wixii la halmaala, laakiin shaqo kuma laha diintaada iyo tayda. Taasi waa hawl qof walba gaarkiisa ugu taal".

Waxay ku doodayaan in Anbiyada iyo Rususha Eebbe ay ahaayeen hoggaamiyaal, caadi ahaanna hoggaamiyanimadoodu aysan ahayn mid dawlad iyo siyaasad shaqo ku leh, balse waxay ahayd hoggaamin xagga ruuxda ah oo ka dhalatay rumayn iyo okobbanaan. Hoggaamiyaha ruuxiga ahina wuxuu nafta ku leeyahay saamayn ka badan tan hoggaamiyaha dan ku baddayga ah. Mid ka mid ah aqoonyahannadan ayaa oranaya: "Qof ahaan, waxay ila tahay in Nebi Muxammed (SCW) uu Muslimiinta u ahaa hoggaamiye diimeed, laakiin aysan u arkayn madaxweyne dawladeed". Waa oraah ay ku qarsoontahay "Diintu siyaasad iyo xukun shaqo kuma leh".

Hadalka uu la soo shir-tay aqoonyahankan Soomaaliyeed, maaha mid cusub, balse waa oraah uu ku dhawaaqay nin u dhashay dalka Masar oo la oran jiray Dr. Cali Cabdirisaaq, kaasoo allifay kitaab uu u bixiyay: "Islaamka iyo Usuusha Xukunka" (الإسلام وأصول الحكم), oo la daabacay sanadkii 1925-kii, wuxuuna yiri: "Islaamku waa risaalo diini ah oo barax-la' sida diimihii ka horreeyey..Nebi Muxammad-na wuxuu ahaa Rasuul Dacwo Diini ah oo barax-la' (khaalis), sida Rusushii ka horreeysey..wax xiriir ah oo ka dhexeeya Islmaaka iyo Siyaasaddana ma jiraan". Wuxuu kaloo yiri: "Nebi Muxammad (SCW) wuxuu ahaa oo keliya Rasuul Dacwo diimeed aan wax xukun ah lagu dheehin..Nebigu ma asaasin Boqortooyo sida hadda kalmaddaan siyaasad ahaan loo fahmo, ma ahayn Boqor, dawladna ma asaasin, mulkina ma raadin".

Wuxuu kaloo wadaadkaasi yiri isagoo ka hadlaya waqtigii Nebiga (SCW): "Xukuumadi ma jirin, Dawladi ma jirin, wax siyaasad ku lug lihina ma jirin, sidoo kale ma jirin nidaam xukuumadeed, Guddoomiye goboleedyo (ولاة) iyo garsoorayaalna ma jirin... waxa keliya oo jiray waa hoggaamin diimeed..kala fogaa siyaasad iyo diin".

Maalmuhu isku ekaa, Dr. Cali Cabdirisaaq boqol sano ka hor ayuu Madhabka Calmaaniyadda ugu yeeray dadka Muslimiinta ah, wuxuuna ahaa caalim ka mid ah culimada Azhar, ma jirin cid ka horreysey oo ku dhawaaqday in Nebi Muxammad uusan xukun Islaami ahi dhisin, dawladna madax u ahayn, waana oraahda saaxiibadeen ay hadda ku hadaaqayaan, oo ay maykarafoonnada u qaateen. Yaa u dardaarmay (أتواصوا به بلهم قوم ضالون).

Haddaba; maqaalkani wuxuu hordhac u yahay maqaallo dhowr ah oo aan jeclahay inaan ku falanqeeyo Mad-habka Calmaaniyadda oo dooddiisu ay soo xoogaysanayso; iyadoo rag aqoon durugsan leh oo Soomaali ah ay wax ka qoreen, dood ay la bareerayaanna soo bandhigeen. Sidaas daraadeed; waxaan jeclaystay inaan iftiimiyo waxa ay tahay calmaaniyaddu, meesha ay kasoo bilaabatay, cidda noo soo waaridday (rartay) iyo saamaynta ay ku leedahay nolosha bulshooyinka casriga ah.

## WAA MAXAY CALMAANIYADDU?

Erayga Calmaaniyad oo afka Carabiga ka mid noqday muddadii dhexe, waxaa loogu dhawaaqaa laba siyaabood oo kala duwan oo kala ah: calmaaniyad iyo cilmaaniyad. Dadka qaarkood waxay u arkaan in eraygan laga soo qaatay kalmadda "cilmi" (science), sidaa awgeed waxay ugu dhawaaqaan "cilmaaniyad", dad yar ayaana sidan qaba.

Hase ahaatee; erayga "calmaaniyad" waa tarjumidda sida ku shaacday Masar iyo Mashriqa Carabta- erayga Ingiriisiga ah "SECULARISM" oo ka yimi: adduun, caalam iyo waaqac; taasoo ku beegan "Muqaddas" oo ah "Diini ama cilmiga Eebbe", wakiilna ka ah samada, awooddeedana gacanta ku haya, furayaasheeda milkiya, kana sarreeya dabeecadda iyo sunnooyinkeeda.

Waxaa qeexidda sare si fiican u muujinaya Qaamuus-aqooneedka Ingiriiska دائرة المعارف البريطانية oo erayga "Secularism" oo lagu fasiro "Calmaaniyadda" ku macneeya sidan: "waa dhaqdhaqaaq bulsho oo ujeeddadiisu tahay dadka in laga leexiyo ku dadaalidda Aakhiro, loona weeciyo adduunka oo keliya; sababtoo ah casriyadii dhexe dadku waxay xoogga saari jireen Alle iyo Aakhiro, waxayna ka dheeraan jireen adduunyada. Si haddaba loo kobciyo dareenka dadnimada iyo adduunyo jacaylka, waxaa xoogga la saaray mad-habka "calmaaniyadda", iyadoo dadku ay bilaabeen inay u soo jeestaan horumarinta aqoonta iyo dadnimada".

Qaamuus-waynaha Firqooyinka iyo Madaahibta ayaa isna "Calmaaniyadda" ku qeexay sidan: "Calmaaniyad (Secularism) waxaa si sax ah loogu turjumi karaa la-diineednimo (اللادينية) ama duniyawi-ni (الدنيوي). Waa aragti ku baaqaysa in nolosha lagu saleeyo cilmi bini'aadmi, caqli, iyo danta guud, iyadoo laga fogaynayo diinta. Dhanka siyaasadda gaar ahaan, waxay ka dhigan tahay in xukunka iyo maamulka laga saaro diinta. Ereygan "calmaaniyad" xiriir lama laha erayga "cilmi" (science)".

“Macnaha guud ee calmaaniyaddu waa kala saaridda diinta iyo dowladnimada, iyo in diinta lagu koobo qalbiga qofka—iyadoo aanay ka gudbin xiriirka u dhexeeya qofka iyo Ilaah. Haddii loo oggolaado inay muuqato, waxay ku ekaanaysaa cibaadooyinka iyo xafladaha sida guurka iyo dhimashada”.

## BILOWGII CALMAANIYADDA IYO SIDAY U KOBOCDAY

Haddii aan rabno inaan “calmaaniyadda” si dhab ah u fahanno, waxaa lama huraan ah inaan dib u jalleecno siday ugu soo dhex barbaartay xadaaradda Masiixiga ah ee Reer Galbeedka, taasoo ay raad wayn ku lahayd: (1) falsafaddii Giriigga, (2) raadkii xukunkii Roommaaniga iyo (3) diintii Masiixiyadda oo ay qaateen.

Fikraddan waxay ka soo ifbaxday Yurub qarnigii 17aad, waxayna u gudubtay Bariga bilowgii qarnigii 19aad, gaar ahaan dalalka Masar, Turkiga, Iiraan, Lubnaan iyo Suuriya, kadibna Tuniisiya, halka Ciraaq ay qaadatay dabayaaqadii qarnigaas. Dalalka kale ee Carabta waxay si weyn u qaateen qarnigii 20aad.

Marka la eego bilowgii hore, muddo dhowr qarni ah ayay diinta Masiixiyaddu u ahayd bulshooyinka reer Yurub: diin balse aan dawlad ahayn, shareeco aan nidaam xukun iyo marjiciyad qaanuun lahayn, risaalo xoogga saaraysa ruuxda iyadoo hal-kudhigeedu yahay: “Qaysar (dawladda) wixiisa u daa, Allena wixiisa u daa” (دع ما لقيصر لقيصر وما لله لله). Muddadaas risaalada Kaniisaddu waxay gaar ku ahayd boqortooyada samada (waxyiga xagga alle ka yimaada), wax awoodana kumay lahayn suldaanka dhulka, iyo qawaaniinta bulshada hagta; ha noqoto dhinaca siyaasadda, arrimaha bulshada, dhaqaalaha iyo culuunta kala duwan. Muddadaas waxaa jiray laba awoodood: (1) awoodda Kaniisadda oo ah tan ruuxiga ama diiniga ah, iyo (2) awoodda madaniga ah ee dawladda, waxayna ahaayeen laba awoodood oo is-ixtiraama oo wada shaqeeya.

Muddo kadib, waxaa soo ifbaxay in Kaniisaddii xadkeedii ka gudubtay oo ay isku darsatay labadii awoodood ee diintii iyo madanigiiba, waxayna huwisay awoodda madaniga ah ee ay la wareegtay sharafta iyo magaca diinta, iyadoo awoodaha madaniga ahi ay noqdeen kuwo aan isbeddel lagu samayn karin oo sida diinta loo ilaaliyo, bulshooyinkii reer Yurubna waxay galeen marxaladdii burburka iyo casriyadii mugdiga ahaa, waxaana soo ifbaxay aragtidii la magac baxday “Xaqa Eebbe ee boqorka” نظرية الحق الإلهي oo ah in boqorka xukunkiisu yahay mid samada laga soo amray oo Kaniisaddu wakiil ka tahay.

Haddaba; si looga hortago awoodda cusub ee ay Kaniisaddu la soo baxday, ayaa waxaa la asaasay kacaankii calmaaniyadda oo dagaal adag ku qaaday xukunkii wadaaddada Kaniisaddu ay hormuudka u ahaayeen, waxaana lagu dul-dhisay calmaaniyadda cusub oo salka ku haysa dhaxalkii aqooneed ee reer Yurub iyo caqli-ku-salaysnaanta iftiiminta Yurub; taasoo caqliga iyo tijaabooyinka cilmiga ku beddeshay “diinta” iyo “cilmiga Ilaahiga ah”.

Kacaanka calmaaniyaddu wuxuu Kaniisadda dib ugu celiyey xuduuddeedii hore oo ah inay ku koobnaato ruuxda, iyo boqortooyada samada, iyadoo la hirgelinayo oraahda: Qaysar u daa xukunkiisa, Allena u daa arrintiisa; waxayna caqliga iyo tijaabooyinka cilmiga ah ka dhigatay marjica loola noqdo maamulka ilbaxnimada aadanaha marka laga soo tago diinta iyo cilmiga Ilaahiga ah, waxaana arrintaas ka dhashay in la kala fogeeyo amaba la kala gooyo diinta iyo maamulka nolosha aadanaha; iyadoo laga duulayo falsafada oranaysa: adduunku isaga ayaa isku filan, waxaana maamulaya asbaabaha Alle ku abuuray awooddiisa dabiiciga ah, loomana baahna maamul Alle iyo sharci xaggiisa ka yimaada oo dunida lagu hago. Isku soo duuboo; calmaaniyaddu waa in: marjiciyadda maamulka adduunka lagu koobo aadanaha, iyadoo wax faragelin ah aysan ku yeelanaynin shareecada Alle iyo waxyigiisuba.

Inkastoo falaasifada reer Yurub qaarkood sida Hobbes (1588-1679), Loke (1632-1716), Leibniz (1646-1716), Rousseau (1712-1778) ay aaminsanyihiin jiritaanka Alle iyo inuu koonka abuuray, haddana waxay ku raacsanyihiin kuwa kale ee Mulxidiinta ah ee jiritaanka Alle inkira in xadaaradda aadanaha iyo maamulkeeda ay ku koobnaato Bani’aadanka, xorna ay ka noqoto shareecada Alle; “Sida ku cad aragtida Aristotle, Ilaah waa mid keliya, kana sarreeya kana gooni ah adduunka, isla markaana waa abuuraha. Hase

yeeshee, wuxuu adduunka iyo dabeecadda dhex dhigay sababo iyo nidaamyo u oggolaanaya inay ismaamulaan oo iskood isu maareeyaan, iyaga oo aan u baahnayn faragelin joogto ah ama daryeel Ilaah ka yimaada ka dib marxaladda abuurista."

Sidoo kale waxa ka caawiyay calmaaniyadda inay guul gaarto aragtida Masiixiyadda ee ku saabsan xiriirka u dhexeeya diinta iyo dawladda. Aragtidan waxay qabtaa in waxa Qaysar (dawladda) leeyahay loo daayo Qaysar, halka diintana lagu koobo badbaadinta ruuxa iyo boqortooyada samada, iyada oo aan bulshada iyo dawladda u soo bandhigin sharci nidaaminaya noloshooda. Arrintaas awgeed, 'ku xayiridda' diinta kaniisadda gudaheeda iyo damiirka shakhsiga waxaa loo arkay 'kacaan dib-u-hagaajin diimeed', halkii loo arki lahaa weerar ka dhan ah diinta.

Waxaa sidoo kale ka caawiyay arrintan dhaxalka Roomaanka ee falsafadda sharci-dejinta iyo nidaaminta, kaas oo ka dhigay 'danta' ama 'manfaca' oo aan ku xaddidnayn diinta akhlaaqdeeda, ama shareecadeeda samada ka timaadda-inuu noqdo halbeegga wax lagu cabbiro. Sidaas awgeed, jidkii loo mari lahaa sharciga la dejiyo ee bini'aadamka (Positive Law) wuxuu u furnaaday calmaaniyadda, iyadoo uu taageerayo dhaxalkan Roomaanka.

Sidan ayay calmaaniyaddu ku dhalatay, iyadoo ka soo dhex baxday macnaha guud ee iftiiminta waaqiciga ku dhisan ee Reer Galbeedka, si loo gaaro kala soocidda samada iyo dhulka, iyo ka xoreynta bulshada bini'aadamka xuduudaha iyo xeerarka shareecada Ilaah. Waxay sidoo kale ku koobtay maamulka iyo maaraynta adduunka bini'aadamka oo keliya, iyadoo u aragta inuu yahay 'sayidka' maamula adduunkiisa iyo noloshiisa.

## GUNAANAD

Qoraalka waxaa inooga soo baxay in Calmaaniyaddu ku dhisantahay aragti kala soocaysa diinta iyo nolosha qaybaheeda kala duwan; ha noqoto siyaasad, dhaqaale iyo hab-dhaqanka bulshada. Waxaana laga soo minguuriyay xadaaraddii Masiixiyadda oo markay la collowday wadaadkii iyo Kaniisaddii, dib ugu noqotay falsafaddii Giriigga oo tibaaxaysa Alle inuu koonka abuuray oo keliya, maamulkiisana ay bani'aadanku leeyihiin iyagoo marjiciyad ka dhiganaya caqliga iyo manfacada. Waxay kaloo dib ugu laabteen qaanuunkii Roomaanka si ay ugu dhaqmaan.

**Maraajicda:**


١. د. محمد عمارة، الإسلام والسياسة الرد على شبهات العلمانيين، مكتبة الشروق الدولية، عام 2008.

٢. د. محمد عمارة، العلمانية بين الغرب والإسلام، دار الوفاء للطباعة والنشر، عام ١٩٩٦م.

٣. د. سفر الحوالي، العلمانية نشأتها وتطورها وآثارها في الحياة الإسلامية المعاصرة، دار الهجرة.

4. Cabdisaciid Cabdi Ismaaciil, Siyaasad aan Sixir lahayn (Diin iyo Dawlad), 2021.






# DOORKA **XISAABIYAYAAASHA** SOOMAALIYEED EE KOBOCA DHAQAALAHA DALKA IYO KALSOONIDA BEESHA CAALAMKA



Cali Xaaji Warsame



Xigashada Sawirka: AI

# HORDHAC

Soomaaliya waxay mareysaa marxalad adag marka loo eego dhinaca dhaqaalaha, siyaasadda, horumarinta, dowlad-dhiska iyo dhismaha hay'adaha muhiimka u ah dowladnimada iyo maamul-wanaaga. Sida ay qortey Hay'adda Transparency International ee qiimeysa musuqa, Soomaaliya waxay heshay 9 dhibcood marka loo eego boqoleyda (9/100) qiimeynta musuq-maasuqa iyadoo 0 ay tahay cidda ugu musuq badan, 100-na ay tahay cidda ugu yar musuq yar, halka wadamada Saaxilka Afrika uu yahay 33, iyadoo ka gashey kaalinta 179aad dalalka la qiimeeyey oo ah 180 sannadkii 2024, taas oo caddeyneysa in kaalinta musuqa ee Somaaliya uu aad xargaha u goostey. Waxaa taas dhinac socda in aysan dalka u dhisneyn hay'adihii maamul-wanaaga iyo isla xisaabtanka sida barlamaan ka madax-bannaan fulinta, hantidhowr madax-bannaan, saxaafad xor ah iyo guddi doorasho oo madax-bannaan.

Sida aan ku xusey daraasaddii aan hore ugu daabacey Majaladda Marag (AHMIYADDA HAY'ADAHA MAAMUL-WANAAGA & HUFNAANTA: XAALADDA SOOMAALIYA – Majaladda Marag), mid ka mid ah tilmaamaha muhiimka ah ee maamul-wanaaga Afrika waxaa lagu soo bandhigay tilmaanta Mo Ibrahim ee lagu qeexo maamul-wanaagga Afrika (Ibrahim Index of African Governance – IIAG), taas oo bixineysa qiimeyn ku saabsan tayada maamul ee waddamada Afrika. IIAG waxay uruurisay 81 tilmaamood iyo 265 tilmaan-isbeddel oo ka soo baxay 54 mashruuc oo xog ururin ah, iyadoo ka soo xiganeysa 47 ilo-xogeed oo madax-bannaan ee Afrika iyo caalamka ah. Soomaaliya waxay ku dhacdey kaalinta 53aad markii loo eego 54-ta dal ee Afrikaan ah, taas oo la macna ah in aan liiska ka galney meesha ugu hooseysa.

Duruufahaas dalkeena ka jirta waxay muhiim ka dhigeysaa in la helo ama dib loo dhiso hay'adaha isla-xisaabtanka iyo daah-furnaanta, taas ayaana keentay in ay lagama maarmaan tahay in la dhiso hay'ad kulmisa xisaabiyayaasha Soomaaliyeed, oo wax weyn ku kordhin kara nidaaminta xisaabaadka dalka, iyadoo loo marayo nidaamka caalamiga ah ee la isku raacsan yahay, taas oo ugu dambeyn suurtagelisey in la aasaaso Hay'adda Xisaabiyayaasha Soomaaliyeed (Somali Institute of Certified Public Accountants – SICPA).

Sida la wada ogyahay, Soomaliya waxay horseed u tahay dalalka ugu nugul adduunka ee loo yaqaan (world's most fragile states), iyadoo la tacaalaysa musuqmaasuq baahsan, qaraabo-kiil heersare ah, amni-xumo, maamul liita, iyo kalsoonida dadweynaha ee dowladda heerarkeeda kala duwan oo hooseysa. Isku daygii ugu horreeyay ee guuleysta ee lagu soo celinayo maamul dowlad Soomaliyeed wuxuu ahaa Shirka Carta 26 sano ka hor, laakiin waxaa la oran karaa wax weyn kuma kordhin dhismaha hay'adaha lafdhabarta u ah hanaqaadka dowladnimada, isla xisaabtanka, hufnaanta maamul iyo in qofka Soomaaliga ah lagu qiimeeyo aqoontiisa intii wax loogu qeybin lahaa nidaamka 4.5.

Taas macnaheedu ma aha in aan la isku deyin in la dhiso hay'adahaas daruuriga u ah dowlad-wanaaga, ee waxay caddeyn u tahay in Soomaaliya aysan helin hogaan xil-gudasho leh, aaminsan in sharcigu sarreeyo, ilaalinaya xuquuqda dastuuriga ah ee qofka Soomaaliga ah, ka fog musuq iyo fowdo, kaas oo suurtageliya in hoggaanka dalka lagu doorto daah-furnaan, aqoon, wada-ogol, raadraac fiican iyo tixgelinta rabitaanka shacabka.

# TAARIIKHDA AASAASKA HAY'ADDA XISAABIYAYAASHA SOOMAALIYEED (SICPA)

Aasaaska Hay'adda Xisaabiyayaasha Soomaaliyeed (Somali Institute of Certified Public Accountants-SICPA) waxay aheyd natiijo dheer iyo dadaal joogto ah oo ay sameeyeen xisaabaadyaasha xirfadlayaasha ah ee Soomaaliyeed, si dib loogu dhiso, loona nidaamiyo xirfadda xisaabaadka ee Soomaaliya. Waxaa xusid mudan in Madaxweynaha jamhuuriyadda uu xeerka Xisaabiyayaasha Soomaaliyeed (Accountants Act) saxiixey 10 Janaayo 2026, iyadoo isla markaasna lagu shaaciyey faafinta rasmiga ah (official gazette) 11 Apriil 2026.

Fikradda in la aasaaso hay'ad qaran oo ururisa xirfadlayaasha xisaabaadka Soomaaliya waxaa ugu horreyn la hindisay sanadkii 2012, markii koox xisaabiyayaal Soomaaliyeed ah ay garteen baahida degdega ah ee loo qabo hay'ad sharciyeed iyo xirfadeed, si ay u taageerto maamulka dhaqaalaha dalka, daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka. Isla sannadkaas, kooxdaas ayaa bilaabay xiriir inay la

sameeyaan Ururka Caalamiga ee Xisaabiyayaasha (International Federation of Accountants - IFAC), iyagoo ka helay talo farsamo iyo qalab aasaasi ah oo loogu talaggalay aasaaska hay'ad xirfadeed. Iyadoo loo marayo IFAC, kooxdaas ayaa sidoo kale la xiriirtay daneeyayaasha muhiimka ah ee gobolka iyo caalamka, oo ay ku jiraan Ururka Xisaabaadyaasha Pan Afrikanka ah (The Pan African Federation of Accountants - PAFA), taas oo xoojisay dadaalladii hore ee ku aadanaa horumarinta hay'ad matasha xisaabiyayaasha Soomaaliyeed oo dhan.

In kasta oo dadaal xoog leh la bixiyey, haddana si degdeg ah looma gaarin guushii la filayey, waxaan yimid gaabis sababo badan dartood oo la xiriira tartamo kale, hase yeeshee marna lagama tanaasulin in mar uun ay hirgasho ximiladdii xirfadeed ee xubnahii aasaaska u dhigey hay'adda xisaabiyayaasha Soomaaliyeed. Si kastaba ha ahaatee, sannadkii 2014, ayaa dib boorka looga jafey hindisahaaas, iyadoo loo marayo ka qaybgal ballaaran oo lala yeeshay xisaabiyayaasha Soomaaliyeed dalka gudihiisa iyo dibadiisaba. Sidoo kale xilligaan wuxuu ku beegmay kororka xiisaha loo qabo shahaadooyinka xirfadeed sida ACCA, CPA, CIMA, CIPFA iyo kuwa kale ee la midka ah, taasoo muujinaysa baahida loo qabo in la soo celinayo dib-u-haneynta xirfadda xisaabaadka.

Sanadkii 2015, SICPA oo kaashaneysa IFAC iyo PAFA, waxay bilowday diyaarinta Xeerka Xisaabiyayaasha Soomaaliyeed, iyada oo dhisaysa aasaaska sharci ee hay'adda. Horumarinta hay'addu waxay sii socotay illaa sanadkii 2017, oo ku beegnayd markii la magacaabay guddi-maamul oo ku meel gaar ah, oo ay ku jiraan Maamulaha Guud (Chief Exectuive Officer – CEO), Agaasimaha Maamulka (Director of Administration), iyo Agaasimaha Xubinimada Hay'adda (Director of Membership).

Guddigaan waxay si xirfad leh u hogaamiyeen dadaalladii dhiirrigelinta xubinimada hay'adda, waxayna si guul leh u diiwaangeliyeen tiro badan oo arday ah oo raadinaya shahaadooyinka xirfadeed ee xisaabaadka. Muddadii u dhaxeysay 2018 ilaa 2020, SICPA waxay xoojisay xiriirka iyo ka-qaybgalka shaqada laamaha muhiimka ah ee dowladda, oo ay ku jiraan Wasaaradda Maaliyadda, Xafiiska Hantidhawrka Guud, Bangiga Dhexe ee Soomaaliya (CBS) iyo Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

Sidoo kale, intii lagu guda jiray howlahaan, Hay'ada SICPA waxay xoojisay xiriirka ay la leedahay hay'adaha xisaabiyayaasha ee caalamiga ah iyo kuwa goboleed, waxayna dib-u-eegis ku sameysay Sharciga Hay'adda Xisaabiyayaasha Soomaaliyeed, si loo suurtageliyo in uu la jaanqaado xaaladda Soomaaliya, waxayna xeerka u turjuntay Af-Soomaali, iyadoo sidoo kalena la wadaagtay daneeyayaasha, oo ay ku jiraan Bangiga Adduunka (World Bank).

Waxaa xusid mudan in Hay'adda SICPA ay kordhisey horumarinta dhinaca dhijitaalka ah (digital presence) oo muhiim u ah horumarinta iyo joogitaanka baraha bulshada, oo ay ku jiraan website iyo kayd xog-xirfadeed loogu talaggalay xisaabiyayaasha. Waxaa la gaaray meel muhiim ah sanadkii 2020, markii Wasaaradda Maaliyaddu si rasmi ah ugu gudbisay Xeer-Ilaaliyaha Guud ee dalka (Attorney General) sharcigii Hay'adda Xisaabiyayaasha (Accountants Bill), si loo hubiyo sharci ahaan, kadib markii laga yeeshay la-tashiyo heer sare ah dhammaan inta ay khuseyso oo ka mid yihiin hoggaanka dowladda.

Bishii Sebtembar 2021, SICPA waxay gashay waji cusub dhinaca hoggaaminta, iyadoo la magacaabay guddi cusub oo maamul. Waxaa Guddoomiye (Chairman) loo doortey Cabdullahi Tahliil, waxaana Maamulaha Guud (CEO) loo magacaabay Burhaan Saalax. Hoggaamintan cusub waxay xoojisay dadaalladii u-doodista hay'adda, iyo iskaashiga Xafiiska Hantidhawrka Guud (Office of Auditor General), iyadoo horumarin weyn ku sameysey muuqaalka hay'adda iyo kalsoonida heer qaran iyo mid goboleedba. Hawlaha wacyigelinta iyo horumarinta xirfadeed ee SICPA ayaa si weyn u kordhay intii u dhexeysay 2021 iyo 2024, iyadoo hay'addu ay kordhisey ololaha xubinnimada, waxayna hay'addu la falgalay ururada xirfadeed ee gobolka, waxayna martigeliyay shirkii xubnaha ee sanadlaha ahaa ee ugu horreeyay bishii Juun 2022, kaas oo isku keenay in ka badan 200 qof oo ka-qeybgalayaal ah, kuwaas oo ka kala socday bulshada, iyadoo ay marti ku ahaayeen mas'uuliyiin sare ee socdey dowladda, taasoo muujisay taageero qaran oo xooggan oo ku aadan muhiimadda hay'adda iyo kaalinteeda.

SICPA waxay kale oo xoojisay jiritaankeeda gobol iyo caalami. 24kii Nufeembar 2024, hay'adda SICPA waxay heshay xubinnimada Ururka Xisaabaadyaasha Pan Afrikanka ah (Pan African Federation of Accountants Associate Member), taasoo calaamad u aheyd guul muhiim ah oo loo marayo aqoonsiga caalamiga ah. SICPA waxay si firfircoon uga qaybgashay golayaal xirfadeed oo heer sare ah, oo ay ku jiraan Kongareyskii 8aad ee Afrika ee Xisaabaadka (ACOA), oo ka dhacay Kigali,

iyo sidoo kale kulanka 4aad iyo 5aad ee Kongoresyka Afrikada-bari ee Xisaabaadka (EACOA).

Hawlgalladan is-daba-jooga ah ee ay ku dhaqaaqdey SICPA waxay noqdeen madal la isku weydaarsado aqoonta, lagu soo bandhigo dhaqamada ugu wanaagsan ee caalamiga ah (benchmarks), loona diyaariyo xisaabiyayaasha Soomaaliyeed sidii ay ula jaanqaadi lahaayeen dhigooda adduunka, gaar ahaan gobolka. Isla waqtigaas, SICPA waxay qabatay kulamo istiraatiiji ah oo ay la yeelatay daneeyayaasha muhiimka ah, oo ay ku jiraan hoggaanka International Federation of Accountants, Maamulka Guud ee PAFA, iyo hay'ado kala duwan oo xeer-dejin ah, taasoo xoojisay ballanqaadkeeda iskaashiga iyo waafajinta shaqadeeda heerarka caalamiga ah.

Kadib ansixintii Golaha Wasiirada DFS ee bishii Janaayo 2023, sharciga Xisaabiyayaasha si rasmi ah ayaa loogu gudbiyay labada gole ee Baarlamaanka Federaalka. Guddiyada baarlamaanka ayaa dib-u-eegis ku sameeyey qodobada sharciga, iyagoo tixgeliyay aragtida daneeyayaasha, waxayna hubiyeen is-waafajinta qaab-dhismeedka sharciga iyo hay'adaha dowladda.

10-kii Febraayo 2024 ayey ku dhamaatay ansixinta 1aad ee xeerka ee Golaha Hoose ee Baarlamaanka, halka Aqalka Sare laga ansixiyay Sharciga 31-da Luulyo 2024, iyadoo sharcigana loo gudbiyay madaxweynaha si uu u saxiixo, xeerna uga dhigo, hase yeeshee, dib-u-eegis ayaa geliyay iyadoo dib looga ansixiyay Golaha Baarlamaanka labada aqal bishii Diseembar 2025, Madaxweynuhuna si rasmi ah uu u saxiixay Xeerka Xisaabiyayaasha Soomaaliyeed 10kii Janaayo 2026, ka dibna si rasmi ah ayuu loogu shaaciyey Faafinta Rasmiga ah 11-ka Abriil 2026, taas oo calaamad u aheyd aasaaska sharci ee rasmiga ah ee Hay'adda Xisaabiyayaasha Soomaaliyed – SICPA, taas oo u taagan hay'ad qaran oo xirfadeed oo sharci ahaan laga aqoonsan yahay Soomaaliya.

# MUHIIMADDA HAY'ADDA XIRFADLAYAASHA XISAABAADKA EE SOOMAALIYA

Soomaaliya waxay ku jirtaa marxalad muhiim ah oo ku suntan dib-u-dhis dowladnimo, kadib colaad iyo dagaal sokeeye oo aad u dheeraadey, taasoo ka dhigaysa xirfadda xisaabaadka mid aad muhiim u ah mar walba. Sababaha ay hay'adda Xisaabiyayaasha Soomaaliyed SICPA ay muhiimka u tahay waxaa ka mid ah:

**1. Dib-u-dhiska Kalsoonida Maaliyadeed ee Dalka**

Caqabadaha ugu waaweyn ee ka jira dalka waxaa ka mid ah wacyi-gelin la'aan ka dhex jirta madaxda iyo hawl-wadeenadda dawladda iyo kuwa gaarka ah ee ku saabsan muhiimadda xisaabiyeyaasha xirfadeed, iyo sidoo kale maqnaanshaha xisaabiyeyaasha aqoonta leh ee ka shaqeeya dalka. Hay'ad xirfadeed oo dalka ka hanaqaada si toos ah ayay arrintan u xallisaa.

**2. Soo Jiidashada Maalgashiga & Gargaarka Caalamiga ah**

Xisaabiyeyaashu waxay ka caawiyaan hay'adaha dowladda iyo kuwa rayidka ah inay u hogaansamaan shuruucda iyo inay hagaajiyaan howlaha la xiriira daneeyayaasha maalgashiga iyo deeq-bixiyayaasha. Nidaam-xisaabeed fadhiya waa shaqo muhiim u ah soo jiidashada maalgashiga shisheeye iyo gargaarka dibadda, kuwaas oo lagama maarmaan u ah horumarka iyo dib-u-dhiska dalka.

**3. La-dagaallanka Musuqmaasuqa & Dhaqaale-dhaqidda**

Waxaa jira sababo badan oo ka dhigaya xirfadda xisaabaadka mid muhiim u ah horumarka dhaqan-dhaqaale ee bulshaweynta Soomaaliyeed. Kuwa ugu muhiimsan waa la-dagaallanka musuqmaasuqa iyo la-dagaalanka dhaq-dhaqaaqa lacagaha sharci-darrada ah (illicit financial transactions), taas oo aheyd ballanqaadkii dowladda federaalka ah ay la gashey beesha caalamka inay wax ka qabaneyso.

**4. Maareynta Gargaarka**

Dhab ahaan Soomaaliya waxay ku tiirsan tahay kaalmada beesha caalamka, waxayna ka heshaa gargaarka xaddi weyn leh oo ka yimaada deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah, halka miisaaniyadda dowladda dhexe lagu kabo saddex-meelood laba-meelood (2/3), taas oo caddeyneysa in dowladda Soomaaliya ay si mug leh ugu tiirsan tahay gargaarka kabidda miisaaniyadda iyo deeqaha caalamiga ah. Dhismaha hay'adda xisaabiyayaashu waxay laf-dhabar u tahay hubitaan in kheyraadkan si waxtar leh loo maamulo, oo uu gaaro meelaha loogu talaggalay, taas oo ka caawineysa dowladda ka hortagga maamul-xumo, khiyaano iyo musuq baahsan.

**5. Shaqo-Abuurka Dhallinyarada & Awood-siinta Deegaanka**

Doodda ugu muhiimsan baahida loo qabo hay'adda Xisaabiyayaasha Soomaaliyeed waxay ku tiirsan tahay in dowladdu ay leedahay waajibaad ku aadan shaqo-abuurka dhallinyarada, gaar ahaan dhinaca shaqooinka xirfadleyda ah, nidaamka xisaabaadkuna wuxuu ka mid yahay qorshahaas, taas oo siinaysa dhallinyarada aan hadda dalka ka shaqeyn fursad ay ku helaan shaqo-abuur, isla markaana abuureysa shaqooyin xisaabiye ama xirfado kale, gaar ahaan haddii la abuuro nidaam cashuur-celin oo horumarsan iyo weliba hay'ad doowladeed oo xor ah, oo u xilsaaran nidaaminta cashuuraha iyo dakhliga dalka (Somalia Revenue Authroity), halka hadda dowladda ay ka shaqaaleysiinayso xisaabiyayaasha dalalka kale, si ay u baaraan lacagaha caalamiga ah iyo xisaabaadka hay'addaha dowladda.

Mudnaanta muhiimka ah ee SICPA iyo xirfadlayaasha xisaabaadka Soomaaliyeed waa qorshe istiraatiijiyadeed oo ku aaddan:-

- Diiwaangelinta xirfadlayaasha xisaabaadka iyo hirgelinta heerarka shirkadaha.
- Ilaalinta danaha shacabka iyada oo loo marayo anshax iyo isla-xisaabtan.
- Dhisidda iyo horumarinta nidaamka xisaabaadka, kormeerka iyo heerka anshaxa maaliyadeed, iyadoo la raacayo hababka ugu wanaagsan ee caalamiga ah.
- Bixinta shatiga shaqo (professional licence) iyo kormeerka u hogaansanaanta nidaamka maaliyadeed.
- Horumarinta xirfadda xisaabaadka, iyada oo loo marayo waxbarashada, aqoonsiga shahaadada xisaabaadka iyo horumarinta xirfadeed ee joogtada ah (Continuous Professional Development - CPD).

**6. Mudnaanta Aqoonsiga Sharciga Xisaabiyayaasha**

Xeerka Hay'adda xisaabiyayaasha ee la ansixiyey wuxuu aqoonsan doonaa SICPA inay tahay hay'ad sharci ah oo u taagan xirfadda xisaabaadka ee Soomaaliya, taas oo u oggolaaneysa inay fuliso waajibaadka nidaaminta shaqooyinka la xiriira xisaabaadka, ayna hesho aqoonsi dadweyne, iyadoo haddana ka mid noqoneysa ururadda xisaabaadka ee gobolka iyo caalamka. Taasi waxay muhiim u tahay daneeyayaasha iyo maalgashadayaasha Soomaaliyeed iyo kuwa caalamka, iyagoo heli doona kalsooni ay ku go'aan qaadan karaan dhinaca maalgashiga, marka la hirgeliyo xisaabaad nidaamsan.

Xisaabiyayaasha Soomaaliyeed waxay noqon doonaan xubno ka tirsan hay'ad sharci ah, laga aqoonsan yahay dalka gudihiisa iyo dibadiisaba, taas oo u taagan hubinta tayada iyo fursadaha horumarinta xirfadeed ee sii socota illaa jiilalka dambe. Gunaanadkii, xirfadlayaasha xisaabaadka ee Soomaaliyeed ma aha tirooyin (not just numbers), laakiin waxay aasaas u yihiin:

- Dhisidda dowladnimo qaangaar ah
- Soo kabashada dhaqaale ee dadka iyo dalka,
- La-dagaallanka musuqmaasuqa, qaraabo-kiilka iyo wax-is-dabamarinta,
- Soo celinta kalsoonida dadweynaha ee hay'adaha maaliyadeed ee dalka.

Shaqada Hay'adda Xisaabiyayaasha Soomaaliyeed (Somali Institute of Certified Public Accountants-SICPA) iyo hay'adaha la midka ah ayaa muhiim u ah xasilloonida iyo koboca fog ee Soomaaliya dhinaca dhaqaalaha, hufnaanta maamulka iyo ka-hortaga musuqa. Bulsho xirfadlayaal ah waxay abuuri kartaa dhaqaale-koror mug leh oo wax ka bedella nolosha muwaadinta Soomaaliyeed. SICPA waxay u baahan tahay garab-istaaga bulshada marxaladda aasaaska ah, kalsoonida xisaabiyayaasha iyo kartida maamulka hay'adda.

# GOONI-ISU-TAAG MISE MIDNIMO?
# MUSTAQBALKA SOMALILAND IYO SOOMAALIYA AQOONSIGA ISRAEL KADIB!



Cabdullaahi Faarax Mire




**Xigashada Sawirka**: Hortabin Media

## Horudhac

Soomaaliya waa dal hodan ku ah kheyraad dabiici ah, lehna juqraafi istiraatiiji ah iyo bulsho wadaagta diin, dhaqan iyo taariikh qoto dheer. Si kastaba ha ahaatee, sawirka guud ee dalku mantay maaha mid ka tarjumaya goobta istaraatiijiyadeed ee uu ku yaalo, ama dadkiisu ay wada xanbaarsanyihiin dareen midnimo. Soddon iyo shan sano kaddib burburkii dawladdii dhexe, dalku waxa uu taaganyahay weli kalabayr adag, ilaa hadana lama hanan dawladnimo taabo gal ah, lagamana xoroobin ku tiirsanaanta shisheeye ee dhanka amniga iyo dhaqaalaha. Si dhab ahna looma xallin khilaafaadka gudaha ee u dhexeeya dadka Soomaaliyeed.

Run ahaantii, tan iyo markii Israa'iil ay ku dhawaaqday aqoonsiga waxa ay ugu yeertay "Jamhuuriyadda Somaliland" dabayaaqadii 2025, taas oo noqotay aqoonsigii ugu horreeyay ee maamulka Somaliland helo soddon iyo shan sano kaddib, Soomaaliya waxay gashay marxalad cusub oo u baahan in la dul istaago, taariikh hore, mid hadda qormaysa, iyo mustaqbal danbe oo u baahan in lagu eego aragti dheer.

## Aragtida Gooni u goosadka

Guud ahaan, aragtida gooni u goosadka Somaliland waxay ka dhalatay fashilaad maamul oo ku habsatay dawladnimada Soomaaliya, gabood falladii uu ku kacay xukunkii kacaanka ee uu hoggaaminayey Janaraal Maxamed Siyaad Barre, iyo burburkii dawladii dhexe ee 1991 dii, kuwaas oo dhammaantood sii xoojiyey fikirka gooni u goosadka.

Waxaa xusid mudan, in tan iyo intii Soomaaliya ku jirtay burburka dawladnimo, dagaalladii sokeeye iyo dowladihii ku meel gaarka ahaa, maamulka Somaliland uu helay madax bannaani maamul (de facto) ah, hirgaliyey doorashooyin qof iyo cod ah, iyo hannaan xukun oo si nabad ah loola kala wareego, iyadoo ay ku tartamaan axsaab siyaasadeed. Hase ahaatee, Somaliland weligeed ma helin aqoonsi dawladnimo, kumana guulaysan jabinta xayndaabka sharciyadda Qaramada Midoobay, Midowga Afrika iyo Urur goboleedyada. Dawladaha caalamkuna waxay adkeeyeen ilaalinta midnimada dhuleed iyo gobannimada Soomaaliya.

## Halkee tusbuxu ka furmay?

Tobankii kii sano ee u danbaysay, mustaqbalka midnimada Soomaaliya iyo gooni-isu-taagga Somaliland waxaa qeexaayay silsilado dhacdooyin ah oo isku xiran. Waxaa ka mid ahaa heshiiskii DP World ee casriyeynta Dekedda Berbera (2016), kaas oo Itoobiya bilowgii hore laga siiyay 19% saamiga mashruuca. Maalgashigan oo dowladda Soomaaliya aysan talo weyn ku lahayn, wuxuu furay albaabka jabinta gobannimada dhaqaale ee dalka. Saamigii Itoobiya ee markii dambe laga noqday wuxuu ahaa calaamad muhiim ah oo aan si dhab ah loo falanqayn, taas oo muujisay in mashruuca dekeddu lahaa ujeeddo istaraatiiji ah oo ka fog ganacsi, ahaana dhagax dhigga qorshe ka dhan ah midnimada Soomaaliya.

Waxaa xigay dhacdo ka culus oo xiriir dhaw la leh maalgashiga dekedda, waana heshiiskii is afgaradka (MOU) ee Itoobiya iyo Somaliland bishii Janaayo 2025 kala saxiixdeen, kaas oo Itoobiya siinayay marin badeed ay u madaxbanaantahay oo dhan 20km, halka uu dhigayay in Itoobiya aqoonsato Somaliland. Ugu dambayntiina, waxaa soo baxay aqoonsigii Israa'iil ee Somaliland 26 Diseembar 2025, oo ahaa tallaabo si cad uga hor imaanaysa xeerarka iyo dhaqanka diblomaasiyadeed ee caalamka, looguna talo galay in ay sii dhammaystirto shaqooyinka ka horeeyey.

Marka silsiladda dhacdooyinkaan la isku daro, waxa ay muujinayaan istaraatiijiyad isku xiran oo ujeeddadeedu tahay in la burburiyo midnimada Soomaaliya iyo madaxbannaanideeda. Awoodaha dabada ka riixaya shaqadaan, isla markaana dhacdooyinkaan ka dhex muuqda waa: Imaaraadka Carabta, Itoobiya iyo Israa'iil, kuwaas oo si xawli ah, ku wada shaqada kala-goynta Soomaaliya, iyagoo dhaqaale, maalgashi, xiriir caalami ah iyo aqoonsi qayaxan iyo mid dadban ku taageeraaya Somaliland.

## Biyo-xireenka Midnimada

Dhanka kale, Soomaaliya waxaa u hirgalay tillaabooyin macno weyn u leh xoojinta midnimada, haddii ay sifiican u hirgalaan sida: deyn-cafinta, qaadista cunaqabataynta hubka iyo curashada Maamulka Waqooyi Bari. Waxaa kale oo cad in dalal badan oo saaxiibbo ah iyo ururro caalami ah ay si aan hagar lahayn u garab taagayihiin midnimada Soomaaliya iyo madaxbannaanideeda sida: Boqortooyada Sucuudiga, Masar, Qatar, Turkiga, Qaramada Midoobay, Midawga Afrika, Jaamacadda Carabta, Ururka Iskaashiga Islaamka iyo Midawga Yurub.

Hase ahaatee, gudaha dalka waxaa ka jira khataro waaweyn oo wiiqi kara midnimada dalka. Waxaa ugu horreeya khilaafaadka Dawladda Federaalka iyo Dawladaha Xubnaha ka ah, muranka la xiriira dastuurka, doorashooyinka, iyo cadaadiska joogtada ah ee ururrada argagixisada. Intaas waxaa sii dheer, maqnaanshaha aragti iyo dareen qarannimo oo ilaalinaya midnimada dalka iyo gobonnimadiisa.

## AQOONSIGA ISRAA'IIL: MAXAA KU QARSOON?

Aqoonsiga Israa'iil ma aha oo keliya go'aan diblomaasiyadeed; ee waa tallaabo si toos ah u saameynaysa qaab dhismeedka amniga Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed. Israa'iil waxay Somaliland u aragtaa goob istaraatiiji ah oo leh xeeb muhiim ah oo Gacanka Cadmeed saaran, taas oo u suurta gelinaysa in ay xoojiso kormeerka marin biyoodka Bab al Mandab, oo ah mid muhiim u ah ganacsigeeda, qulqulka tamarta caalamka, iyo loollanka milateri ee Bariga Dhexe. Waana aragti salka ku haysa in la xoojiyo isbahaysiga Itoobiya, Imaaraadka Carabta iyo Israa'iil ee Geeska Afrika, oo ka dhan ah dalalka Masar, Sucuudiga, Qadar iyo Turkida oo door muuqda ku leh Soomaaliya. Sidaas darteed, aqoonsiga Israa'iil waa xiisad cusub o oo leh yoolal fogfog, mana aha in loola dhaqmo sidii dhacdo waqti yar kaddib iska dhamaanaysa.

**Saddexda Tiir ee Hubanti la'aanta Mustaqbalka Midnimada**

Si loo dhiso jaantuska suuragalnimada (scenario matrix), saddexdaan hubanti la'aan ayaa cabbir ka dhiganaynaa, kuwaas oo qaabayn doona mustaqbalka xiriirka Soomaaliya iyo Somaliland. Mid kastana wuxuu leeyahay laba natiijo oo iska soo horjeeda.

**Tiirka kowaad: Jihada Aqoonsiga**

Aqoonsigu ma ku ekaan doonaa Israa'iil oo keliya, mise waxa uu noqon doonaa tusbax furmay oo hadba dawladi ku biirto?

- Aqoonsiga oo sii kordha: Somaliland oo hesha aqoonsiga dalal kala duwan oo ku biira Israel sida Imaaraadka, Itoobiya iyo dalal kale ilaa 2040. Taas oo ay garab socoto Midowga Afrika oo cadaadiska lagu saaro dib-u-eegista mabda'a ilaalinta xuduudaha gobonimo ee dalalka iyada oo fursad la siinaayo Mabda'a aaya ka tashiga.
- Aqoonsi Xaddidan: Aqoonsiga Israa'iil oo noqda mid go'doonsan oo aan yeelan saamayn caalami ah. Dadaalka diblomaasiyadeed ee Soomaaliya iyo saaxiibbadeeda caalamka oo ku guulaysta in aan cid kale ku biirin aqoonsiga Israa'iil.

Qiimayntayda guud, jihada aqoonsiga Somaliland aadi doono waxaa ka jira hubanti laa'aan weyn, ugu yaraan fogaan-aragga dhexe, waxaanna arkaa dalku inuusan saarnayn jidka lagu xakamayn lahaa aqoonsiga iyo kala go'a. Waxaa jira shaqo culus oo Imaaraadku wado, doodo la xiira danaha Maraykanka ee saldhigyada ciidan uu ka heli karo Somaliland, hase ahaatee, weli waxaa ila xoog badan natiijada labaad ee xakamaynta aqoonsiga, haddii lagu guulaysto maaraynta khilaafaadka siyaasadeed ee dalka, xoojinta kalsoonida siyaasadeed iyo tayada hay'adaha dawladda.

**Tiirka 2: Xasilloonnida Siyaasadeed ee Dalka**

Hannaanka siyaasadeed ee dalku ma xasili doonaa mise wuu sii kala daadanayaa?

- Xasillooni: Heshiis siyaasadeed ayaa laga gaarayaa doorashooyinka heer federaal iyo heer dawlad goboleed; khilaafaadka Puntland iyo Jubbaland iyo Dawladda Federaalka u dhexeeya waxaa lagu xallinayaa miiska wadahadallada; argagaxisadana waa la sii wiiqayaa tabartooda; dalkuna waxa uu sii hanan doonaa taageerada saaxiibbada caalamka.
- Kala daadsanaan: Qalalaasaha siyaasadeed ee dalka ayaa sii kordhaya; hannan doorasho iyo dastuur aan heshiis lagu ahayn ayaa dalka ka hirgalaya. Waxaa suurta gal ah in khilaafaadka Puntland iyo Jubbaland kala dhexeeya Dawladda Federaalka ay sababaan dagaalo sokeeye, midnimada dalkuna sii kala daadato. Sidoo kale, saamaynta argagixisadu ay sii ballaarato iyagoo ka faa'idaysanaya qalalaasaha siyaasadeed ee dalka. Ugu danbaynna, dalku uu lumiyo awoodda iyo kalsoonida wada xaajood.

Qiimayntayda guud, hannaanka dowladnimada Soomaaliya waxaa saaran culays weyn oo si xad dhaaf ah u yareynaya fursadaha xasilloonida kaddib marka mudo xileedka dawladda hadda jirta uu dhammaaday, iyada oo aan wax heshiis laga gaarin khilaafaadka siyaasadeed ee dalka hareeyey. Waa markii u horraysay oo dalku galo hubanti-la'aan salka ku haysa khilaaf dastuuri ah iyo mid doorasho oo weyn. Kalabayrka siyaasadeed ee dalku taagan yahay haddii aan heshiis laga gaarin, waxaa aad iila xoogan natiijada labaad.

**Tiirka 3: Fursadaha Wadahadalka**

Ma soo bixi doonaan fursado wadahadal oo u dhexeeya Soomaaliya iyo Somaliland, mise hardan iyo is haysiga ayaa hoggaamin doona?

- Wadahadal Nidaamsan: Labada dhinac waxay ku noqnayaan wada xaajood rasmi ah oo la dhex dhexaadinaayo, jidna u baxsha go'aammada kama dambeysta ah ee hannaanka midnimada.
- Is haysi iyo hardan joogta ah: Wadahadal macno leh ma dhacaayo. Xiisadaha u dhexeeya Soomaaliya iyo Somaliland waxa ay yeelan doonaan isku dhac milatari oo u dhexeeya maamulka Waqooyi Bari iyo Somaliland. Khilaafaadka siyaasadeed ayaa sii kordhaaya. Somaliland waxa ay sii qaadi doontaa tillaabooyin xagjir ah oo ka dhan ah midnimada dalka. Waxaa ka dhalan doona cadaadis siyaasadeed iyo mid dhaqaale oo saamayntiisa leh. Sidoo kale, waxaa fursado ay khilaafaadka ku sii huriyaan heli doona shisheeyaha danaha siyaasadeed ee ka dhanka ah midnimada Soomaaliya leh.

Qiimayntayda guud, aqoonsiga Israa'iil kadib, is haysiga iyo hardenka ayaa ila ah natiijada xoogga badan. Damaca Somaliland ee ah in ay aqoonsi dheeraad ah hesho, wuxuu ka indha tiraaya fursadaha wadahadalka. Sidoo kale, dhismaha Maamulka Waqooyi Bari iyo hanaqaadkiisu waxa uu sii wiiqayaa aragtidii gooni-u-goosadka Somaliland uu ku dhisnaa. Intaas waxaa dheer, dalalka danaha gurracan ka leh Somaliland sida Itoobiya iyo Imaaraadku waxa ay ka shaqaynayaan sidii fursadaha wadahadalka loo yarayn lahaa, iyaga oo Somaliland ufuri doona fursado dhaqaale iyo xiriir caalami oo hoos u dhiga abateedka ay u hayaan wadahadallada.

**Gunaanad**

Mustaqbalka Somaliland iyo Soomaaliya ma aha mid si fudud loo saadaalin karo, sababtoo ah waxa uu ku dhisanyahay is-dhexgalka hardanka awoodaha gudaha iyo kuwa dibadda. Inkastoo ay jiraan dadaallo lagu kala fogeynayo labada dhinac, haddana weli waxaa jirta fursado dhab ah oo lagu heli karo xal waara oo ku dhisan wada-hadal, is-ixtiraam iyo dan guud. Si loo gaaro mustaqbal deggan oo horumar leh, waxaa lama huraan ah, in la xoojiyo xasilloonida siyaasadeed, lana dhiirrigeliyo wada-hadallo dhab ah, si xooganna loo yareeyo faragelinta dibadda ee danaha gaarka ah wata, middaas ayaa horseedi karta mustaqbal xanbaarsan ififaalo wanaagsan oo dib u dhalin kara midnimo ku dhisan caddaalad iyo kalsooni.

# YAAN SULEEKHO KAA DHIMAN!



Maxamed Cali
Adan (Hoorri)



Maansadani waxa ay soo baxday hilaaddii 22,12-2022-kii. Waxa ayna dhiirrigelin iyo guubaabo u tahay dhallinta Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaanba. Maansadu waxa ay si toos ah ula hadlaysaa dhallinta ku dhaqan gobolka Sanaag iyo waxgaradkooda kala duwan. Marna waa xusuus iyo dhito jaan-tus u ah waayihii iyo sooyaalkii cuddoonaa ee la soomaray beri-samaadkii. Sanaag, waa gobol irmaan, dihin, cogor ah, leh macdan iyo xooloba. Marna waa goob leh sooyaal iyo taariikh mug leh.

Taariikhdaa mugga iyo miisaanka ku dhaadan ama ku guntan, maanta yaa wax ka og? Waa kumaa qofka maraxeeda haystaa? Xaggee ku damaysey gobannimadii iyo garashadii lagu faani jirey? Yaa maanta aroorrada kala ah; Aroow-weyn iyo Aroor-yar ka arrimiya? Kumaa daaqa oo xoola ku dhaqda Moon iyo Mash-caleed? Laasqoray xaggee ku dambaysey? Wiilka ka arradan dhaqanka, diinta, sooyaalka iyo dadnimada oo dhex mushaaxaya Ragaad, Xidid, Saaqood, Galgala iyo Guud-Cayow yaa keenayn? Adiguse diyaar ma u tahay inaad ogaato waxa aad haysato? Maxaa se kaa maqan? Waa kuma ninka la qorsheeyey 30 sano ka hor dhimashadiisa iyo dhiig-baxiisa oo iska soo taagan, weliba isga oo dammane ah?

Dhammaan, weydiimahani waxa ay ku wareegayaan giraanta hortaada taal iyo fundhucyada laguu fadhiyo, jidka laguugu jiro, dhabbada lagugu gaadayo, darka lagaa celinayo iyo sabadka lagaa rarayo. Waa gar jaalle! Waxa aad tahay qaafil aan summad lahayn! War hurddaayow iska hurud horaa loo yidhi "Ninba dooxada wax ku soo dadab"..

Subcis maaha maansadu
Hal sarbeeb ah kuma jiro
Misna hadal ma saafnee
Ciisa Dhiif sarkaalkii
Saajinkii kelya adkaa
Waxan saaka leeyahay
Seerihii Quddaax iyo
Saaqood war iga sii?
Sankii Gorayga yaa deggan?
Simanaarka yaa dhiga?
Talisyada sirdoonkuna
Suuliyada ma baaraan?
Kumaa Seeta-walacle ah?
Salbadhoodhi waa kuma?
Sama-talisku waa kee?
Samaddoon ma adigaa?

Saaxiibkay CIISOW
Saahidkii Kutubo mee?
Sirta Fiqiga diinkiyo
Siirada ma wariyaa?
Mise Sool abaaruu
Salli geed ku jiifaa?

Saaxiibkay CIISOW
Aw –siciid sareedada
Iyo saaca khayr jiro
Sabeen waa la siinjirey
Xaggee subaxan joogaa?

Saaxiibkay CIISOW
Ximistina sifaha guud
Subur iyo Wasaafaad
Weheshada Safiinaha
Burjigiyo siraha culus
Weli sadar ma baaraa?
Nabarrada ma simayaa?

Saaxiibkay CIISOW
Lo'dii siinaddalahayd
Sako miyaa ka dhiibtaa?
Mise waysa seegteen?

Saaxiibkay CIISOW
Waxa taar la soo dhigay
Saxaafaduhu weriyeen
Cali Aadan sikhigii
Sabo inaad wadaagtaan
Suugaan ku marisaan
Cowsame salkeediyo
Afartii Sandaqadood.
Marna seermaweydiyo
Kal-tirsiga salsiladaha
Sidii dirir ahaan jirey
Saadaal ku sheegtaan.

Saaxiibkay CIISOW
Nimankii Saliid galay
Haddey Sugurre joogaan
Sunta noogu milaayaan
Maadigaa Saldanad iyo
Sooyaal i bari kara?

Siinkaygu wuxu yahay;
Ina-Shire suldaakii
Dowladuhu sifeeyeen
Birta sulubka ka adkaa
Sange dhabarkii saarnaa
Seyidkii is haysteen
Si kastaba ha noqotee
Hadduu saaka soo baxo
Ama sahan inaga helo
Doqon sarara-weynoow
Ku salaamimaayee
Yey suleekho kaa dhiman.

Siinkaygu wuxu yahay;
Saaqidnimo ma fiicnoo
Surin laguma gaaroo
Sidko laguma maalee
Saxal baa ku mirayee
Yaa Suqurka hoosiyo
Sararaha Gadoobkiyo
Marinnadii Sanaag iyo
Halkii saantu kuu tiil
Doqon sarara-weynoow
Subax yaa ka sarakaca?

Siinkaygu wuxu yahay;
Sabadii Caleed iyo
Gurigii Siraadnaa
Suunnaari hogan jirey
Siirada wadaadkiyo
Sirta lagu cirbixin jirey
Socotada daryeel iyo
Soohan loogu qali jirey
Marna dhiilo saabliyo
Sibraar caano geelana
Sooryo looga dhigi jirey
Doqon sarara-weynoow
Saaka yaa atoor ka ah?

Siinkaygu wuxu yahay;
Saddex baan ku dhaartaye
Yaa Xubeera kaa siray?
Laasqoray ka salowdeye
Sebenkaa madowga leh
Kumaa sahanka loo diray?

Saxaraha-lamood iyo
Baradaad ku sugan tahy
Ma su'aal gingiban baa?
Ninna aanu sixi karin?

Yaa saqaafka kuu qoray?
Yaa saboolka kaa dhigay?
Sahaydaada yaa qubay?
Soortaada yaa wada?
Saanadi ha joogtee
Doqon sarara-weynoow
Dunidee ku sugan tahay?

Siinkaygu wuxu yahay;
Waa seben colaad iyo
Siidhi laysku yeershee
Horta soor ma leedahay?
Maxaa saanad wadataa?
Sangehee ku joogtaa?
Salabkiisu buuxaa?
Hub maxaa ka sidataa?

Siinkaygu wuxu yahay;
Ninka saraf-sanaayow
Kolna sacabsanaayow
Subkadow hurdaayow
Markaa suuqa joogtaan
Sinta bidix ma sayrtaa?
Socod dumar ma leedahay?
Sacaadada adduunkana
Doqon sarara-weynoow
Sifir miyaa ka joogtaa?




**Website**: https://maragnews.com/

**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA
MARAG